# KALA DOORASHADA ITOOBIYA EE SIYAASADA CADAALADA XILLIGA KALA GUURKA

## QABYO QORAALKA LOO DIYAARIYAY WADA TASHIGA DANEEYAYAASHA

WAXAA LADIYAARIYAY BISHII JANUARY EE 2023

የሽግግር ፍትህ
TRANSITIONAL JUSTICE

# KALA DOORASHADA ITOOBIYA EE SIYAASADA CADAALADA XILLIGA KALA GUURKA

## QABYO QORAALKA LOO DIYAARIYAY WADA TASHIGA DANEEYAYAASHA

## WAXAA LADIYAARIYAY BISHII JANUARY EE 2023

**TUSMO**

HORDHAC------------------------------------------------------------------------------------------------------------4

QAYBTA 1AAD----------------------------------------------------------------------------------------------------5

SOOYAALKA TAARIIKHEED EE BAAHIDA LOO QABO CADAALADA KALA GUURKA IN LAGA HIRGALIYO ITOOBIYA---------------------------------------------------------------------------------------------5

1.1. Waayo aragnimada Caalamiga ah ee Kusaabsan Cadaalada Kala Guurka---------------------- 5

1.2. Itoobiya iyo hanaanka Cadaalada xiliga kal guurka-----------------------------------------------7

1.3. Maxaa loogu Baahanyahay Cadaalada Kala Guurka ah Itoobiya? ----------------------------- 12

QAYBTA LABAAD-------------------------------------------------------------------------------------------16

2.1. Hordhac------------------------------------------------------------------------------------------------ 16

2.2. Ciqaabida----------------------------------------------------------------------------------------------17

2.2.1. Guud Mar--------------------------------------------------------------------------------------------17

2.2.2. Ciqaabid: Danbiyada Mudan in Laciqaabo---------------------------------------------------- 18

2.2.3. Ciqaabida: Xuduuda lagu Koobayo kuwa danbiga looga shakiyo---------------------------- 21

2.3. Hay, adaha Dawlada: Yaa hogaaminaya baadhitaank, ciqaabta iyo Hanaanka Garsoorka?23

2.3.1. Guud Mar--------------------------------------------------------------------------------------------23

2.3.2. Maxkamadaha Sharciga-----------------------------------------------------------------------------23

2.3.3. Baadhitaanka iyo Ciqaabida wakaaladaha-----------------------------------------------------24

2.3.4. Dib uahabayno Sharci: Danbiyada ka dhanlka ah Bani Aadanimada----------------------- 25

2.4. Xaqiiqo Raadin----------------------------------------------------------------------------------------27

2.4.1. Guud Mar--------------------------------------------------------------------------------------------27

2.4.2. Qaybaha ugu waawayn ee Xaqiiqo Raadinta--------------------------------------------------- 28

2.4.3. Hayaadaha: Yaa Hogaaminaya Xaqiiqo raadinta? --------------------------------------------- 29

2.5. Dib Uheshiisiin---------------------------------------------------------------------------------------- 31

2.5.1. Guud Mar--------------------------------------------------------------------------------------------31

2.5.2. Noocyada Dib Uheshiisiinta Cadaalada Kala Guurka-------------------------------------- 32

2.5.3. Xafiisyada: Yaa hogaaminaya Hanaanka Dib Uheshiisiinta? ---------------------------- 32

2.6. Cafiska---------------------------------------------------------------------------------------------------- 35

2.6.1. Guud Mar-----------------------------------------------------------------------------------------------35

2.6.2. Shuruudaha iyo Xaaladaha lagu Bixiyo Cafiska----------------------------------------------------36

2.6.2. Hay'adaha: Yaa Bixinaya Cafiska? -----------------------------------------------------------------37

2.6.3. Xaaladaha Cafiska uu Sharcigu Ogol yahay------------------------------------------------------ 38

2.7. Magdhowyada---------------------------------------------------------------------------------------40

2.7.1. Guud Mar------------------------------------------------------------------------------------------------ 40

2.7.2. Qaababka Magdhowyada ee Nidaamka Kala-guurka Cadaaladeed----------------------------40

2.7.3. Hawlaha Muhiimka ah ee Dhismaha Hanaanka Magdhowga------------------------------------ 41

2.7.4. Hay'ada: Yaa Hogaaminaya/xidhiidhinaya Hanaanka Mogdhowyada? ---------------------- 42

2.8. Dib-u-habeynta Hay'ada-----------------------------------------------------------------------------44

2.8.1. Guud Mar------------------------------------------------------------------------------------------------ 44

2.8.2. Unugyada Dib-u-habeynta Hay'ada fulinaysa Kala-guurka Cadaaladeed---------------------45

2.8.3. Hay'adaha:- Yaa Hogaaminaya Dib-u-habeynta Hay'adeed? ------------------------------------ 45

2.9. Arrimaha Kale ee Muhiimka ah una Baahan Go'aano laga Gaadho------------------------------47

2.9.1. Xad Fullineed Ku Meel-gaadh ah ee Geedi-socodka----------------------------------------------47
2.9.2. Kaalinta Nidaamyada Cadaalada ee Dhaqanka ku Saleysan-------------------------------------55
QEYBTA 3aad: XULASHADA QAAB-DHISMEEDYADA HAY'ADEED EE NIDAAMKA KALA-GUURKA CADAALADEED--------------------------------------------------------------------------------56
3.1. Mabaadiida lagu Hogayo Geedi-socodka Kala-guurka Cadaaladeed-------------------------56

3.2. Kala-doorashada Isku-duwida/xidhiidhinta Hay'adeed: Doorashada 1aad:-Kala-guur Cadaaladeed adeegsanaya Hay'adaha iyo Qaab-dhismeedyada horey usii jiray-----------------57

4. GEBO-GEBAYN-----------------------------------------------------------------------------------------------63

**HORDHAC**

Cadaalada xiliga kala guurku waxay ukeentay wadamo badan nabad waarta, dib U heshiisiin iyo cadaalad, kuwaas oo isku dayayay inay kasoo baxaan colaadaha ka dhasha dagaalada sukeeye, iska hor imaadyada/khilaafka iyo ama kaligii talisnimo una gudbaan hab dimuqraadi ah iyo abuuritaanka qaab dhismeed siyaasadeed oo looga gudbo khilaafkii/ismarin waagii lasoo maray

Jimciyada quruumaha ka dhaxaysaa[1] waxay taageeero ufidisay/unafidisaa wadamada iyo bulshooyinka kasoo baxay/baxaya xaaladaha xad gudub ee xuquuqda aadamaha, una gudbay/gudbaya habka cadaalada xiliga kala guurka oo ka kooban isla xisaabtan, helida cadaalad iyo dib uheshiisiin. Heer gobal, siyaasada cadaalada ee xiliga kala guurka ee ururka Midawga Afrika (AUTJP), ee lagu meel mariyay Addis Ababa sanadkii 2019, waxay ku nuux nuuxsanaysaa ahmiyada ay leedahay talaabooyinka siyaasada cadaalada xiliga kal guurka (Mida rasmiga ah iyo mida aan rasmiga ahaynba) ee lagu meel mariyo ka qayb galka, wada tashiga si xal loogu helo xad gudubyadii horay udhacay, qaybsanaanta iyo sinaansho la,aanta iyo in la

[1] United Nations Approach to Transitional Justice: Guidance Note of the Secretary-General. 2010

abuuro jawi ku haboon hirgalinta hab dimuqraadiya,  hab dhaqan-dhaqaale, horumar iyo daganaansho[2].

Taariikh haan, nidaamka cadaalada xiliga kala guurku wuxuu ku abtirsadaa inuu soo bilaabmay tobanaankii sano ee ugu horeeyay qarnigii labaatanaad. Waxaa jira caddaymo badan oo muujinaya dhaqan galinta cadaalada xiliga kala guurka ee wadamada Laatiin Ameerika iyo Afrika. Waayo aragnimadaasi waxay suurto galisay in la helo tabo iyo xeelado badan oo la adeegsado marka lahirgalinayo cadaalada xiliga kala guurka iyo adkaynta dimuqraadiyadeed ee wadamada kasoo baxaya kaligii talisnimada.

Itoobiya waxay marar badan isku dayday inay dhaqan galiso qaybo ka mida cadaalada xiliga kala guurka. Hase ahaatee, wuxuu dadaalkaasi la midho dhali waayay, kana dhigay mid kala daadsan oon wada socon, jiritaan la, aanta qaab dhismeed buuxa oo ah cadaalada xiliga kala guurka. Sidaas darteed waxaa laqabaa, si loo adkeeyo dimuqraadiyada, loona xaqiijiyo nabad waarta, inay lagama maarmaantahay  tahay in wadankani yeesho siyaasad dhamaystiran oo ah cadaalada xiliga kala guurka, marka la eego xaalada xaqiiqda iyo xaalada bulsheed iyo siyaasadeed ee wadanku xiligan ku sugan yahay iyadoo casharo laga baranayo xaalada heer qaran iyo tan caalamiba.

Diikumentigan/qoraalkani ku saabsan kala doorashada siyaasada cadaalada xiliga kala guurka ee itoobiya waxaa la diyaariyay iyadoo laga duulayo natiijada ka dhalatay daraasad ay sameeyeen xeel dheerayaal gashi ka helay Daneeyayaasha Diikumentigan/qoraalkani wuxuu ka kooban yahay saddex qaybood oo waa wayn. Qaybta koowaad waxay baadhitaan ku samaynaysaa sooyaalka taariikheed ee cadaalada kala guurka Itoobiya iyo ku haboonaanshiisa xaalada xilligan. Qaybta labaad waxay soo bandhigaysaa falanqaynta kala doorashada khayaaro kala duwan oo siyaasadeed oo ku saabsan nidaamyo fara badan oo la adeegsankaro marka lahirgalinayo cadaalada xiliga kala guurka ee Itoobiya. Qaybta ugu danbaysaa waxay baadhaysaa, soona bandhigaysaa qaab dhismeedyo hay, adeed iyo sharciyeed si looga dhaqan galiyo nidaamka cadaalada xiliga kala guurka Itoobiya.

**QAYBTA 1AAD**

[2] The AU Transitional Justice Policy Framework. 2019

**SOOYAALKA TAARIIKHEED IYO BAAHIDA LOO QABO CADAALADA KALA GUURKA IN LAGA HIRGALIYO ITOOBIYA**

### 1.4. Waayo aragnimada Caalamiga ah ee Kusaabsan Cadaalada Kala Guurka

Diikumentigan/qoraalkani ku saabsan kala doorashada siyaasada cadaalada xiliga kala guurka ee itoobiya waxaa la diyaariyay iyadoo laga duulayo natiijada ka dhalatay daraasad ay sameeyeen xeel dheerayaal gashi ka helay Daneeyayaasha.

Cadaalada xiliga kala guurku waa hanaan la maro si loo gaadho nabad waarta, dib U heshiisiin, xasilooni iyo saraynta sharciga iyadoo laga talaabsanayo dhaqanadii hore ee udulqaadan jiray meel ka dhacyada lagaysto iyo sinaansho la,aanta. Waa hanaan ka hortaga hoos udhaca dimuqraadiyada iyo soo laba kaclaynta kaligii talisnimo ee wadamada dhawaan dimuqraadiyada qaatay. Ka midho dhalinta latacaalida gafafkii/meel kadhacyadii horay loo gaystay iyadoo la adeegsanayo hanaanka cadaalada xiliga kal guurka waxay horseedaa kor uqaadida saraynta sharciga iyo nabad waarta.

Wadamo waxoogaa ah (xayn wadamo ah) ayaa dhaqan galiyay halbeegyo  ama qaabab kala duwan oo ah cadaalada xiliga kala guurka si loo wajaho tagtooyinkii xumaa. Hababka loo wajahay waxaa kujiray ciqaabta kuwii looga shakiyay inay gaysteen gabood falo, ayna ciqaabaan maxkamado caalamiya, kuwa isku dhaf ah ama kuwo heer qarana; koomishino xaqiiqo raadis ah; dib uhabayno sharci iyo hay, adaha dawlada, is-cafin, taalooyin xasuuseed oo loo dhiso dhibanayaasha, barnaamujyo mag-dhaw siin. Waxaa jira waayo aragnimo badan oo ah in qaababkan mar lawada adeegsaday ama iyagoo kala madax banaana kali kali loo adeegsaday.

Waayo aragnimadu waxaa kalooy Ina tusinaysaa in diirad saarida habka isla xisaabtanka ee ciqaabtu uu leeyahay galdaloolooyin. Waa marka koowaada hababka xooga saara in laciqaabo gabood falayaasha laguma gaadho nabad waarta iyo dib uheshiisiin sababtoo ah ku ekaanshaha ciqaabidu waxay meesha ka saarayasaa in la adeegsado hababkii kale ee xaqiiqo raadinta, is bogsiinta, dib uheshiisiinta iyo mag dhaw siinta. In lagu oogo dacwado gabood falayaashu waxay sii xumayn kartaa khilaafka, hadii la dabakho iyada oo aan tixgalin lasiinayn qaybaha kale

ee muhiimka ah ee cadaalada xiliga kala guurka. Waa marka labaada ciqaabidu waxay inta badan ku ekaataa qayb yar oo gabood falayaal ah maadaamooyna waaqici ahayn in laciqaabo dhamaan gabood falayaashii tirade badnaa eeku lug lahaa kiisaskii faraha badan ee lagaystay.Sidoo kale ciqaabtu ma aha hab sibuuxda wax uga tari kara ciqaabida dhibaatooyinka sida farsmaysan loo gaysto; waxaa laga yaabaa inayna si buuxda usoo saarin, ugana jawaabin sababihii keenay inay dhacaan gabood faladii horay loo gaystay. Cabirada qaarkoodna waxay tilmaamayaan in dacwad ku oogida danbiilayaashu ay sidoo kale caqabadayso hababka is-bogsiinta iyo is-xaal marinta maadaama ay suurto galinaysa oo kaliaya inay habkan ka qayb qaataan qayb yar oo kamida dhibanayaashu.

Si loo xaliyo goldaloolooyinkan, loona dhiiri galiyo nabda waarta, meelo badan oo aduunyada kamida waxaa la adeegsaday nidaamyo iyo qaabab kala duwan oo loola tacaalo. Qaababkan loola tacaalayay waxaa si wayn loogu adeegsaday inay wax kataraan in laxaqiijiyo isla-xisaabtan, gaadhida runta, bogsiinta dhaawicii dhimir-nafsiyeed iyo hoos u dhicii qiyem-qab ee ku dhacay dhibanayaasha iyo kuwii ka badbaaday, dhiirigalinta dib uheshiisiin iyo mag-dhaw siin iyo dhisida bulshada iyo hay,adaha dawlada. Nidaamyadani ma aha kuwa isdiidaya in markaliaya la isticmaalo, ee waa kuwa iskabaya.

Dhaqan galinta nidaamka cadaalada kala guurku waa in lala eegaa xaalada gaarka ah ee wadanka kujira xaalada kal guurka ahi ku sugan yahay. Nidaam kasta oo ah cadaalada kala guurku wuxuu leeyahay dhinac adag iyo dhinac jilicsan.Fahanka waayo aragnimada wadamada aan isku xaalad dhawnahay ee isticmaalay hab kaliya amaba hab kale oo ah cadaalada kala guurku waxay muujinayasaa in wadamadaasi ka faaiidaysteen dhinicii wanaagsanaa ee noocyadii ay xusheen. Qaalib noqoshada isticmaalida hababkii horay loo adeegsaday waxay fududaysay qaabaynta iyo dhaqan galinta nidaam dhamystiran oo ah cadaaladeed xiliga kala guurka oo kudhisan waayo aragnimo.

### 1.5. Itoobiya iyo hanaanka Cadaalada xiliga kal guurka

Kasakow waayo aragnimadeeda kusaabsan kala guurka dhaqaale iyo Kan siyaasadeed ee xiliyada casriga ah ee taariikhdeeda ka dhacay wadankeeda, Itoobiya waligeed masamaynin,

mana taabo galinin nidaamyo buuxa oo dhamaystiran oo ah cadaalada xiliga kala guurka oo si farsamaysan ula tacaala tagtooyinkii, dhisina mustaqbal wanaagsan. Markaad eegto xaalidihii kala guurka ee dhawaan dhacay, lama dhaqan galin hab dhamaystiran oo qiimeeyay xaalada, soo saarayna warbixin madax banaan oo sax ah oo laga duuli karo oo sheegaysa nooca, sababaha, tusaalayaasha iyo cawaaqibka ka dhashay gabood faladii hore.

Markii uu Dhargigu xukunka kala wareegay nidaamkii boqortooyada, dawladu waxay xabsiyada dhigtay shakhsiyaad caan ahaa, hogaamiyaashii dhul goosiga, wasiiro, iyo masuuliyiin dawladeed oo kale oo looga shakiyay inay gaysteen cadaalad daro, iyo inay galeen musuq maasuq iyo waliba inay sida laleeyahay masuul ka ahaayeen masiibadii macaluusha ahayd ee ku habsatay Wollo. Dawladu waxay dhistay koomishinka baadhitaanka si uu ubaadho gabood falada lasheegayo. Hase ahaatee, kahor intaanuu koomishinku dhamaystirin baadhitaankiisii, Dhargigii wuxuu xukun dila kufuliyay Lixdan (60) sarkaal oo ah masuuliyiintii dawlada iyadoon laraacin nidaamkii sharci iyo kii garsoorba. Dhargigu wuxuu xukunka hayay mudo kabadan todaba iyo toban sano. Mudadii uu xukunka hayay muuna dhaqan galinin cadaalada xiliga kala guurka. Sidaas awgeed sanadkii 1974, markii laga guurayay nidaamkii kaligii taliska aha ee boqortooyada loona guurayay nidaamkii milatariga lama isticmaalin nidaam macno leh oo ah cadaalada kala guurka.

Markii Jabhadii Dimuqraadiga Kacaanka Itoobiya (EPRDF) qabsatay xukunka dalka sanadkii 1991, waxay ciqaabo kusoo rogtay qaar kamid ahaa saraakiishii xukuumadaii Dhargiga kuwaas oo lagu sheegay inay gaysteen danbiyo ay kamid yihiin xasuuq. Waxaa lagu aasaasay Xeer Ilaaliye gaara (SPO) oo hoos taga Raysul Wasaaraha bayaanka tirsigiisu ahaa 22/1992 , waxaana loo awood siiyay baadhitaano iyo oogida kiisaska danbiyada; wuxuu awood uyeeshay inuu hawl galiyo in kabadan 400 oo shaqaale ah si uu ugaadho ujeedooyinkiisa. Mudadii uu jiray xafiiska xeer ilaaliyaha gaarka ahi (SPO) wuxuu baadhay danbiyo si gaara loo xushay oo ay gaysteen saraakiishii Dhargiga, waxaa kiisas ciqaaba lagu soo rogay kuwii gaystay khaladaadka oo uu kujiray madaxwaynihii hore ee wadanka Kornayl Mengistu Hailemariam iyadoo lagu helay, laguna xukumay danbiyadii lagu soo oogay ee ay ka galeen shacabka mudadii todaba iyo tobanka sano ee uu Dhargigu xukunka hayay.

Dawladii EPRDF waxa kalooy ka dhistay meelo kala duwan oo wadanka ah Matxafyo, taalooyin iyo xarumo lagu xasuusto si loo sharfo dhibanayaashii qulqulotooyinka Dhargiga ee uu sida arxan darada iyo cadaalad darada ah ula dhaqmay. Marka si qoto dheer loo falanqeeyo hanaankii cadaalada xiliga kala guurka ee lahirgaliyay mudadaas oo si wayn diirada usaaraysa ciqaabida, waxaa soo baxaysa inay lahayd ugu yaraan saddex god daloolooyin (gaabis).

**Waa marka koowaada** hanaankaasi wuxuu katagay qaybo kale oo ah Cadaalada xiliga kala guurka oo aad muhiim u ah, sidaas awgeed wuxuu kuguul daraystay inuu keeno dib uheshiisiin qaran. Wuxuu ku harqiyay maxkamadihii kiisas ciqaaba oo aad ufarabadan isagaoon tixgalin siin ku lamaanaynta hanaanyada kale ee ay kujiraan xaqiiqo raadinta, dib uheshiisiinta iyo mag-dhaw siinta.

**Waa talabaade**, hanaankani wuxuu ku ekaa oo kaliya ciqaabida kiisas gaar loo xushay; waxaana lagu sifeeyay '*cadaalada ka guulaysta'* sababtoo ah waxaa laciqaabay oo kaliya saraakiishii Dhargiga, waxaana laiska dhaga mariyay danbiyadii ay gaysteen shacabka iyo kooxaha kale ee hubaysnaa. Waxaa kaloo dacwadahan ciqaabta ah lagu naqdiyay inay baal mareen damaano qaadka hanaan garsoor oo cadaalada.

**Waa tasadexaade,** hanaankani wuxuu ahaa mid dhibanayaasha kaqayb qaatay ay xadidnaayeen, sababtaas awgeedna wuxuu ku guul daraysatay hanaankani inuu xalsiiyo dhibanayaashii; waxayna kaalintoodu ku ekayd oo kaliya marag furid. Sidoo kale waxaa isna meesha kamaqnaa fursada ah in dad cusubi ay kusoo biiri karaan dacwadaha ciqaabta iyo kuwa madaniga ah.

Hadaba wixii ka danbeeyay isbadaladii siyaasadeed ee kahanaqaaday wadanka sanadkii 2018, waxay dawladu bilawday qaadida talaabooyin gaara oo lagula tacaalayo cadaalad daradii horay udhacaday, cabashooyinkii iyo meel ka dhacyadii foosha xumaa ee loo gaystay xuquuqda aadamaha. Talaabooyinkan waxaa looga danlahaa abuuritaanka jawi haboon oo ah adkaynta dimuqraadiyada: waxaa kujiray soo saarida raali galin rasmiya, dhisida koomishinka dib uheshiisiinta, usoo saarida shuruuc si tartiib tartiib ah iyo isku dayida dib uhabaynta hay, adaha dawlada ee suurta galinaya cadaalada xiliga kala guurka ah.

Hadana saas oo ay tahay, ujeedooyinkii cadaalada xiliga kala guurka lama gaadhin;  sababihii ugu waawaynaa ee fashilka keenay waxaa kujiray ku guul daraysigii in la isticmaalo hanaan leh qaab shaqeed dhamaystiran oo ay kujiraan dhamaan qaybihii kale ee cadaalada xiliga kala guurka iyo waliba wax ku ool la,aantii cabiradii shakhsi ee la hirgaliyay. Gaar ahaan waxaa lagu ogaaday ukuur galid caqabadahan soo socda.

**Ciqaabida**

Iyada oo ayjireen in waxoogaa kamida saraalkiishii dawlada lagu oogay dacwada la xidhiidha musuq maasuq iyo danbiyo ka dhan ah xuquuqda aadamaha:

- Dacwaduhu way xadidnaayeen mug ahaan; mayna kujirin dhamaan danbiyadii ka dhanka ahaa xuquuqda aadamaha ee ay gashay dawladii EPRDF hogaaminaysay
- Dacwadaha la oogayna waxay ku ekaayeen oo kaliya kuwo gaar loo xushay
- Hanaanka garsoor ma ahayn mid waafaqsan sharciga; mana ahayn mid kasoo kabtay sanadihii faraha badanaa ee uuna haysan madax banaanida iyo madax banaanida hay,adeed
- Habka xukun gaadhida waxaa hadheeyay daahitaano/dibdhacyo; Kiisas badan bay tahay wali in go,aan laga gaadho
- Hanaanka oogista ciqaabtu ma ahayn mid loo hirgaliayay si xal ukeenaysa dhibanayaasha, wuxuu abuuray dareen ah ‘cadaalada oo ladaahiyaa waa cadaaladii oo ladifiray’- Sidaas awgeed ma ahayn hanaan keenaya dib uheshiisiin iyo is-cafis;
- Caqabado soo jireena oo lala xidhiidhinayay bahda cadaalada: hanaanka waxaa gadh wadeen ka ahaa saraakiil boolis, xeer ilaaliyaal iyo garsoorayaashii dawlada ee masuulka ka ahaa meel ka dhacyada waxaan lafuliyay iyadoon loo baahnayn in shakhsiyaadkii aan lamarinin nidaam cadcadaan iyo qiimayni ku dheehan tahay.

**Cafin**

Sanadkii 2018 waxaa lameel mariyay Bayaanka tirsigiisu yahay 1089/2018 ee kusaabsan Hanaanka Siinta iyo Hirgalinta Cafiska si loo xaliyo Gol daloolooyinkii kajiray hanaanka cafinta. Isla sanadkaas gudihiisa waxaa lameel mariyay bayaan kale oo tirsigiisu yahay

1096/2018 si qaab dhamaystiran loogu maamulo hanaanka siinta cafiska.- iyadooy ujeedooyinka laga lahaana ay ahayd inuu keeno nabad galyo iyo xasilooni, abuurana daganaansho qaran, horseedo dib uheshiisiin dhaba iyo inuu balaadhiyo fagaaraha siyaasadeed. Kuwa loogu talo galay inay ka faaiidaystaan nidaamkan waa shakhsiyaadkii ka qayb qaatay dunuubtii lagalay mudooyinkii ay jirtay daganaansho la, aanta siyaasadeed iyo kuwii ku lug lahaa danbiyada siyaasadeed. Si kastaba ha ahaatee hanaankan cafis wuxuu yeeshay god daloolooyinkan soo socda.

- Isagoo baal maray istaandarada ay aduunyadu isla qirsan tahay iyo  talobixinada xeel dheerayaasha in lagu dabakho nidaamka cadaalada xiliga kala guurka, tusaale ahaan heerkan cafis wuxuu si shuruud la,aana u ogolaaday in dib loo dhigo ama lahakiyo danbiyadii loo haystay  eedaysanayaasha, isagoo kaliya shuruud ka dhigay in eedaysanayaashu mudo lix bilood gudahooda codsi ku keensadaan;
- Hanaankan Cafis wuxuu ku guul daraystay inuu tix galiyo codkii dhibanayaasha iyo inay lasocdaan hanaanka cafiska, mag dhawga iyo in raali galin lasiiyo dhibanayaasha;
- Hanaankani makeenin ujeedadii ahayd in gabood falayaashu ay ka shalaytoodaan danbiyaday horay ugaleen; qaar badan oo umuuqday inay danbiyo galeen oo lagu sii daayay hanaankii cafiska ayaa ku laabtay xabsiga iyagoo galay danbiyo kale oo culays ahaan udhigma kuway horay ugaleen;
- waxaa su’aali katimid kalsoonida ay dadku ku qabeen awooda dawlada uleedahay inay dhaqan galiso shuruucda; waxaa larajaynayay in dadka ka faaidaystay hanaanka cafisku ay shahaadooyin ka helaan xafiisyada dawlada federaalka iyo kuwa deegaanada; hase ahaatee majirin nidaam fiican oo lagu daba galo hirgalintiisa, sidaas awgeed shakhsiyaad aan wadan shahaadooyin ama caddaymo muujinaya in lacafiyay ayaa bulshadii kusoo biiray, taas oo si togan usaamaysay kalsoonidii lagu qabay hanaanka.

**Qaab dhismeedka hay, adeed**

Koomishinkii dib uheshiisiinta waxaa lagu aasaasay bayaanka tirsigiiisu yahay 1102/2018; waxaana loo awood siiyay inuu qiimeeyo, daaha ka rogo, iyo inuu aqbalo danbiyadii laga galay xuuqda aadamaha, cadaalad daradii, cabashooyinkii iyo guul darooyinkii. Ujeedada laga lahaana waxay ahayd dhisitaanka nabad waarta iyo nidaam dimuqraadiyadeed oo kudhisan dib uheshiisiin iyo cadaalad. Hase ahaatee mudo xileedkii koomishinku waxay dhamaatay bishii Febraayo ee sanadkii 2022, inkastoo koomishinku bilaabay shaqooyino kala duwan oo hordhac ah, hadana wuxuu ku guul draystay inuu ka midho dhaliyo wax kamida qorshihiisii ama ujeedooyinkii loo aasaasay. Sababihii ugu waawaynaa ee dhaliyay inuu koomishinku fashilmo waxaa kujiray;

Dhismaha koomishinka lagama hormarin hanaan macno leh oo dadwaynaha lagaga qayb galiyay, wadatashina lagala sameeyay dhismihiisa; dadwaynaha iyo xeel dheerayaasha muhimka ah lagalama tashan qabyo qoraalkii bayaanka; xalaalnimada sharci ee koomishinka waxaa saamayn togan kuyeeshay kaqaybgal la, aanta dadwaynaha ee soo jeedinta,  xulashada iyo magacaabida koomishineerada; awoodaha iyo waajibaadka waxqabad ee lasiiyay koomishinku ma caddayn, qaar badan oo kamid ihina waxay ahaayeen kuwo ayna suurto gal ahayn in lafuliyo; tusaale ahaan xidhiidhka uu koomishinku laleeyahay nidaamyada kale si cad looguma qeexin bayaanka-qaar kamida awoodaha lasiiyayna waxay is diidayeen am ka horimanyeen awoodaha iyo waajibaadyada lasiiyay nidaamyada kale ee cadaalada kala guurka ; koomishinka waxaa lasiiyay awoodo waawayn oo ayna suurto gal ahayn inuu fuliyo; koomishinka waxaa lasiiyay awooda ah inuu hogaamiyo hanaanka wadatashiga qaran; mabda ahaan hay,adaha dib uheshiisiintu waxaa haboon inayna uqaadan masuuliyad ahaan ajandaha dib ueheshiisiinta qaran iyo shaqooyinka laxdhiidha xalinta khilaafyada ; qaar kamida koomishineerada koomishinku waxay ahaayeen kuwo siyaasada si firfircoon ugu lug leh, ama loo arkayay inay yihiin kuwo dhinac ujanjeedha, ama danbiyo horay ugalay ama dhibanayaal; koomishineeradu ma ahayn shaqaale rasmiya; waxaa intaas sii dheeraa tirade koomishineerada oo saayid ahaa (41)- kuwaas oo aad uga badnaa tirade halbeegyada caalamiga  ah ee ay yeeshaan koomishineeradu oo ah(25) ;

Marka laga soo tago dhisida hay’ado cusub, dawladu waxay sidoo kale hirgalisay dib uhabaynta hay,ad' dawladeed oo ay si gaara ubartilmaameedsatay iyadoo si wayn diirada

usaaraysay maamulka ciidanka asluubta iyo milatariga iyo hay,adaha amaanka. Hadana saas oo ay tahay waxaa jiray shakhsiyaadyo wali daacad u ah maamuladii hore oo haya boosas saamayn leh oo si aan qarsoonayn iyo si qarssonba ugu shaqaynayay inay minjo xaabiyaan adkaynta dimuqraadiyada.

Gabagabadii iyo gunaanadkii, iyada sida la ogyahay lasameeyay dadaalo farabadan oo lagu hirgalinayo qaar kamida qaybaha cadaalada kala guurka, hababkani waxay keeneen waxoogaa natiijo ah. Dadaaladii ay kujireen kuwii lahirgaliay ilaa iyo intii labilaabay dib uhabayntii baaxada waynayd ee sanadkii 20018 gudihiisa, ma ahayn kuwo dhamaystiran, gaadhsiisan intii loo baahnaa, oo wax ku oola. Tani waxay meesha kasaartay riyadii laqabay ee ahayd in loo isticmaalo nidaamka cadaalada kala guurka qaab lagu horistaagi karo nidaamyadii cabudhinta. Markasta oo uu wadanku ku guuldaraysto inuu lamacaamilo sababaha asalka u ah inay dhacaan xad gudubayada iyo cadaalad daradu, waxaa sii hanaqaada ama laba jibaarma khilaafka, dagaalada sukeeye iyo meel kadhacyada xuquuqda aadamaha.

### 1.6. Maxaa loogu Baahanyahay Cadaalada Kala Guurka ah Itoobiya?

Itoobiya waxay ubaahantahay inay latacaasho tagtooyinkeedii hore si ay dib ugu qaabayso mustaqbalkeeda qaab waafaqsan tiirarka cadaalada, sinaanta, xuquuqda aadamaha iyo ka qayb ahaanshaha dhamaan. Isku dayadii iyo dadaaladii ilaa hada lasameeyay si loo hirgaliyo cadaalada xiliga kala guurka manoqon midho dhal, ujeedadii laga lahaana lagama gaadhin. Sidaas awgeed, waxaa lagama maarmaan ah in ladajiyo qaab dhismeed siyaasadeed oo ah cadaalada xiliga kala guurka oo ay xudun utahay xuquuqda aadamaha iyo danaha dhibanaha, kaas oo gashi looga dhigo waayo aragnimada laga helay wadamada kale iyadoon laga tagayn xaalada siyaasadeed iyo bulsheed ee Itoobiya wakhtigan kusugan tahay. Qaybahan soo socdaa waxay si kooban usoo dhigayaan waxyaabaha ugu waawayn ee laga dhigan karo cudurdaar si loo dhiirigaliyo in laga dhigo mawduuc laga wada hadli karo in lahelo Itoobiya hanaan dhamaystiran oo ah cadaalada xiliga kala guurka.

#### a) Xaalada Qaran waxay ubaahantahay Nidaam dhamaystiran oo ah Cadaalada Xiliga Kala Guurka

Wakhtiyadii tagay, waxaa lafaafin jiray/ladaabici jiray waxoogaa warbixino ah oo tilmaamaya in si farsamaysan oo baahsan loo galay danbiyo dhan ka ah xuquuqda aadamaha gudaha Itoobiya. Kasakoow dib uhabaynada sal iyo baarka ahayd ee lasameeyay wixii ka danbeeyay xiliyadii sanadkii 2018, dil wadareedyo, barokicin xooga, iyo burburinta hantiyeed ayaa hadheeyay qaabka siyaasadeed. Cadaalad daro, meel kadhaca xuquuqda aadamaha, fasiraado lamarooriyay oo laga bixiyo tagtooyinkii hore, gaabin laga gaabiyay in jawaab kufilan laga bixyo dhibaatooyinkii lawajahay iyo jiritaan la,aanta hanaan dib uheshiisiineed oo dhamaystiran  oo macno leh, ayaa loo arkay inay kamid yihiin sababaha ugu waawayn ee sii joogtaynaya inay dhibaataba dhibaato kale usii dhiibto Itoobiya.

Marka la eego xaalada Itoobiya  ee ay xad dhaafka noqdeen dadka gaysnaya gabood falada, iyo kuwa loogaysanayo ee noqonaya dhibanayaasha, cadaalad darada soo noqnoqonaysa, shacabka dhibaatada isu gaysanaya iyo tabardarida haya'daha dawlada ee shacabka maamula iyo haysasho la,aantooda  kalsoonida shacabka, waxyaabhaas oo dhan oo isbiirbiirsaday ayaa ka dhigaya mid aan suurto gal ahayn in lasameeyo cadaalad, labixiyo cafin, loo helo taageero dib uheshiisiin dhaba iyadoo la adeegsanayo qaab dhismeedka cadaaladeed ee jira. Iyadoo la eegayo sababtaas, hirgalinta hanaan buuxa oo dhamaystiran oo cadaalada xiliga kal guurka oo ku salaysan xaalada uu qaranku hada ku sugunyahay, loona qaabeeyay mustaqbalka iyo inuu gabi ahaanba latacaalo tagtooyinkii hore, ayaa ah mid lagma maarmaan u ah inuu xaliyo xaalada adag ee Wadanku kujiro.

**b) Hanaan cadaaladeed oo kala guura oo wax ku ool ah wuxuu door wanaagsan ka ciyaara hanaanka dhismaha dawlada iyo jiritaankeeda**

Dib u unkamida midnimada bulshada oo aasaas looga dhigo inay ku qotonto mabaadiida runta, cadaalada, nabadgalyo iyo dib ueshiisiin ayaa muhiim u ah inay Itoobiya banaanka uga saarto khilaafka soo noqnoqonaya iyo gabood falida ku goobtay wadanka. Taariikhda Itoobiya laguma hayo xili lahirgaliyay dib uheshiisiin dhaba. Dawladihii iyo xukuumadihii isku xigxigay waxay mar walba hoos udhigayeen ama dafirayeen jiritaanka khilaaf mudan in tixgalin gaara uu siiyo hanaanka qaab dhismeedkan oo kale. Rabitaanka siyaasadeed ee ah in labilaabo hanaan dib uheshiisiineed oo dhamaystiran wuxuu ahaa mid aan macnawiyan

ujirin-taas oo kadhigan inayna jirin hanaan hagaagsan oo lagula tacaalo cabashooyinka iyo meel kadhacyada baahsan ee xuquuqda aadamaha.

Ku lug yeelashada in si buuxda looga baaraan dago cadaalad darooyinkii iyo tabashooyinkii horay udhacay waa mid xanuun badan laakiin ahmiyad wayn uleh dhismaha dawlada. Hadii aan ladiyaarinin habab noocan oo kale ah, fasiraadaha kala duwan ee laga bixinayo cadaalad darooyinkii hore waxay abuuri cadaawad iyo qaybsanaan bulsho. Sidaas awgeed waxaa haboon in la dhaqan galiyo nidaamyo cadaaladeed oo kala guura si laisugu soo dhaweeyo bulshooyinka kala qaybsan, loo soo celiyo xidhiidhkoodii, loo dhiso kalsooni dhexdooda, loo fuliyo cadaalada la dalbanayo, una keento dib uheshiisiin dhamaystiran. Tani waxay lagama maarmaan utahay in la aqbalo ama la aqoonsado in halaagii iyo dhibaatooyinkii soo gaadhay dhibanayaasha iyo kuwii ka badbaaday, soo celinta karaamada aadamaha iyo fududaynta midnimada bulshada iyo dhismaha dawlada.

**C) Dimuraadiyadayn iyo waarida nabadu masuurtoobaan hadii ayna jirin nidaam wax ku oola oo cadaalada xiliga kala guurka**

Dhidib utaagida dimuraadiyada iyo saraynta sharcigu wuxuu ahaa mawduucii ugu ahmiyada badnaa ee maamulkii yimid wixii ka danbeeyay 2018. Hase ahaatee in loo guuro dimuqraadiyad ay xudun utahay dib uheshiisiin, nabad galyo iyo cadaalad lama gaadhi karo hadii aan lala tacaalin cadaalad darooyinkii hore iyo meel kadhacyadii waawaynaa ee xuquuqda aadamaha iyo xaqiiqo raadinta iyo ogolaanshaha runta. Tiirarka ugu waawayn ee ay ka bilaabmaan cadaalada xiliga kala guurku waa- latacaalida tabashooyinka iyo cadaalad darada la dareensanyahay, taabo galinta dhabta ah ee dimuqraadiyada iyo dhisida nabad waarta kuwaas oo xalkooda loo isticmaalo in lagu daweeyo cadaalad darada soo noqnoqotay iyo meel ka dhacyada.

Hirgalinta cadaalada xiliga kala guurku waxay Itoobiya ka hor istaagaysaa inay dib ugu noqoto nidaamkii kaligii talisnimada, waxay ka qayb qaadanaysaa adkaynta dimuqraadiyada, waxay fududaynaysaa udhaqaaqitaanka bulsho Dagan oo qani ah oo ku aasaasan sinaansho, cadaalad, dib-u-heshiisiin iyo xushmaynta xorriyadaha iyo xuquuqaha aadamaha.

**d) Hirgalinta cadaalada xiliga kala guurku waxay seeska udhigtaa xaqiijinta Xushmaynta xuquuqda aadamaha iyo saraynta Sharciga**

Mid kamida sababaha ugu waawayn ee keena inuu soo noqnoqdo khilaafka dhaliya meel kadhacyada baahsan ee xuquuqda aadamuhu waa maqnaanshaha nidaam leh mabaadii iyo qiyam haga iyo waliba inaan si joogta ah loo ciqaabin shakhsiyaadka kiciya ama kaqayb qaata khilaafka. Badanaa Dadka dhibanaha unoqda khilaafka iyo meel ka dhacyadu waa muwaadiniin Itoobiyaana oo aan ku lug lahayn ama door yar ku leh dhacdooyinka dhaliya rabshadaha. Dawladaha ay ku dhacdo masuuliyada koowaad ee ilaalinta dadka ku hoos jira xukunkooda iyo waliba qaybo kamida indheer garadka ayaa qayb ka ah dhibaatada. Majiro nidaam si wanaagsan ushaqeeya oo kahortaga, yareeya, waliba xaliya meel kadhacyada iyo tacadiyada; waana caqabadaha ama taxadiyada sii xumeeynaya khilaafka. Kuwa bilaaba, gala ama kaqayb qaata meel kadhacyada xun xun mahelaan ciqaabtay mudnaayeen sababo laxidhiidha goldaloolooyin kajira nidaamka isla xisaabtanka. Intaa waxaa sii dheer, nidaamka isla xisaabtanka ee loo hirgaliyay in lagula tacaalo khilaafka soo noqnoqonaya waxaa hadheeyay ku kalsooni la, aanta iyo ka aamin baxa bulshada; hanaanka baadhitaanka iyo oogida dacwaduhuna ma aha mid xudun looga dhigo danaha dhibanaha iyo in laga qayb galiyo.

Hirgalinta hanaan buuxa oo dhamaystiran oo ah cadaalada xiliga kal guurka waxay door muhiima kaciyaartaa in ladhiso nidaam yeelan Kara jiritaan waara oo ilaaliya xuquuqda aadamaha iyo saraynta sharciga iyadoo laxaqiijinayo is-cafin, isla xisaabtan, dhidibo u aasida runta, dhiirigalinta dib uheshiisiin iyo mag-dhaw siin iyadoo la hindisayo nidaam gaara oo isla xisaabtan iyo in si quman diirada loo saaro meel ka dhacyada.

## QAYBTA LABAAD

## KALA DOORASHADA SIYAASADAHA CADAALADA XILLIGA KALA GUURKA

### 2.1. Hordhac

Cadaalada xiliga kal guurka waa nidaam dhamaystiran kaas oo ay kujiraan ciqaab, dib uheshiisiin, cafis shuruud wata, xaqiiqo raadin, mag-dhaw siin iyo dib uhabaynta hay'adaha dawlada. Taabo galkeedu waxaa lahormariyaa marka nidaamyadan loo dabaqo qaab ku haboon duruufaha gaarka ah ee wadanka. Nidaam kasta oo la unkayo oo ah cadaalada xiliga kala guurka waxaa go, aamiya nooca uu noqonayo xaalada xaqiiqda ah ee siyaasadeed, taariikheed, dhaqan dhaqaale ee wadanka iyo nooca nidaamka ladoonayo in loo guuro.

Qaybihii hore, waxaa lagu muujiyay sababta ay Itoobiya oo ah wadan raadinaya kala guur dimuqraadiyadeed ugu baahantahay inay adeegsato hanaanka cadaalada xiliga kala guurka. Hase ahaatee, si loo xaqiijiyo hanaan wax ku oola, waa in lasmeeyaa falan qayn qoto dheer, Lana qaato go, aan kusaabsan noocyada iyo qaababka cadaalada xiliga kala guurka ee laga dhaqan galinayo Itoobiya. Si hanaankaasi unoqdo mid taabo gal ah, waa in laga jawaabo suaasha ah' Nidaamyadee baa kuhaboon Xaaladahee?" Waa maxay habka ugu wanaagsan ama qaab dhismeedkeebaa ku haboon hanaan kasta oo ah cadaalada xiliga kala guurka? Qaybaha soo socdaa waxay si taxadar leh uga baaraan dagaysaa jihooyinka siyaasadeed iyo nidaamyada cadaalada kala guurka ee ku haboon xaalada gaarka ah ee Itoobiya; iyadoo waliba loogu soo bandhigayo khiyaaro kala duwan dadwaynaha iyo kuwa dajiya siyaasaduhu inay kala doortaan.

## 2.2. Ciqaabida

### 2.2.1. Guud Mar

Qaabaynta iyo Hindisida hanaanyo ciqaabeed oo looga danleeyahay ciqaabida kuwa khaldama waa mid kamida nidaamyada kala duwan ee la adeegsado xiliga lafulinayo cadaalada kala guurka. Shuruucda caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha ayaa waajibaad kaga dhigaysa wadamada inay ciqaab kusoo rogaan ficilada danbiga taas qayb ka noqonaysa masuuliyada kasaaran wadamadu inay yagleelaan nidaam qaran oo ilaaliya xuquuqda aadamaha. Tani waxay si gaara usii khusaysaa marka si wayn loogu xad gudbo shuruucda

xuquuqda aadamaha (Tusaale ahaan Mucaahadooyinka/heshiisyada Jiniifa (Geneva), Heshiiska ka dhanka ah Xasuuqa iyo Heshiiska ka dhanka ah jidh dilka (Convention, and the Convention against Torture). Siyaasada cadaalada ee xiliga kala guurka ee ururka Midawga Afrika ee loo soo gaabiyo (AUTJP) ayaa sidoo kale waajibaad kaga dhigaysa wadamada xubnaha ka ah inay ciqaab kusoo rogaan qaybo gaar loo sheegay oo kamida danbiyada.

Muhiimada ay leedahay inuu wadan sameeyo balan qaad ah inay kago, antahay inuu dagta urito masuuliyada ilaalinta xuquuqda aadamaha, waxaa sii dheer muhiimad kale oo ah nidaamka ciqaabeed ee wadani wuxuu ahmiyad wayn uleeyahay xaqiijinta fursad uhelida cadaalada iyo ka hortagida in danbiga laga dhigo mid wadar ahaan loo galay- iyadoo diirada lasaarayo in ciqaabta la shakhsiyeeyo.Intaas waxaa dheer, waxay ka caawinaysaa wadanka inuu kor uqaado saraynta sharciga iyo isla xisaabtanka, bajinta (cabsi galinta) in mustaqbalka meel kadhacyo lagaysto, iyadoo lafududaynayo dib uheshiisiin, nabadayn iyo dimuqraadiyadayn iyadoo dhidibada loo aasayo runta. Dawlada Itoobiya waxay waajibaad masuuliyadeed kasaaran tahay inay ku samayso baadhitaan wax ku oola dhamaan meel kadhacyada xuquuqda aadamaha iyo inay ku ciqaabto kuwa lagu eedaynayo inay danbiyo galeen maxkamado madax banana hortooda. Arinta kusaabsan qaar kamida danbiyada waawayn, Dastuuka Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya (FDRE Constitution) ayaa si cad ugu dhisay ciqaabtu inay tahay qaabka kaliya ee lagu gaadhayo cadaalad iyadoo loo door bidayo qaababka kale ee cadaalada xiliga kala guurka[3]. Nidaam lamida ayay dhigayaan shuruucda caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha iyo heshiisyada caalamiga ah ee bani aadanimadu ee ay Itoobiya qalinka ku duugtay. Waxay ka dhigan tahay in dawlada khiyaarka iyo doorka lasiiyay ee ah inay dooran karto qaababka kale ee nidaamka cadaalada kala guurku uu iska xadidan yahay, ayna ku qasban tahay inay ciqaabto shakhsiyaadka ku lug leh galitaanka danbiyada noocan oo kale ah

### 2.2.2. Ciqaabid: Danbiyada Mudan in Laciqaabo

[3] Article 28(1) states that the commission of 'crimes against humanity, so defined by international agreements ratified by Ethiopia and by other laws of Ethiopia, such as genocide, summary executions, forcible disappearances or torture, shall not be barred by statute of limitation. Such offences may not be commuted by amnesty or pardon of the legislature or any other state organ'.

Qaab dhismeedka nidaamyada cadaalada kala guurka, meel kadhacyada waawayn ee ka dhanka ah xuquuqda aadamaha ayaa lagu soo oogaa dacwado ciqaaba. Hase ahaatee, waxaa qasab ah in lakoobo baaxada danbiyada ay tahay in laciqaabo- iyadoo gaar loo soocayo noocyada danbi ee mudan ciqaab. Marka aan koobno, khayaaradan ama kala doorashooyinkan ayaa haboon in latixgaliyo.

**Khayaarka 1: Hanaan oogis dacwado ciqaabeed oo ciqaaba oo kaliya meel ka dhacyada waawayn ee kadhanka ah xuquuqda aadamaha (Xasuuq, danbiyo dagaal, Danbiyada dhanka ka ah bani aadanimada, danbiyada kale ee waawayn)**

Ciqaabidu ma, aha nidaamka kaliya ee cadaalad lagu gaadhi mudada lagu jiro cadaalada xiliga kala guurka. Hadaan sikale udhigno, ciqaab kaliya laguma xaliyo dhamaan meel ka dhacyada dhanka ka ah xuquuqda aadamaha. Sidaas awgeed, waa in diirada lasaaraa danbiyada waawayn ee lagu aqoonsado sharciyada caalamiga ah ciqaabta iyo kuwa ciqaabta ee heer qaran. Danbiyada noocaas oo kale ah waxaa looga jeedaa danbiyada dhanka ka ah bani aadanimada, xasuuqa, danbiyada dagaalka, dilalka sharciga garsoorka kabaxsan, jidh dilka iyo danbiyada kale ee waa wayn.

**Dhankiisa Adag**

- Khayaarkani wuxuu fursad siinayaa in ladabakho qaybaha kale ee nidaamyada cadaalada kala guurka maadaamoo nidaamka ciqaabtu uu diirada saaro danbiyada waawayn oo kaliya;
- Wuxuu ka faaiidaystaa furasada ah in in dacwadaha ladadajiyo maadaamoo nidaamkani latacaalo oo kaliya danbiyo xadidan;
- Wuxuu sahlaa caqabadaha laxidhiidha hanaanka xulashada maadaamoo ciqaabtu diirada saarto xad gudubyada waawayn ee loo gaysta sharciyada caalamiga ah iyo kuwa heer qaran;

- Wuxuu xoojiyaa in la,aqbalo istaandarka heer caalami ee ah hanaankan iyo kordhinta caddaymaha si loo xaqiijiyo isla xisaabtan gaara;

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan)**

- Danbiyada intooda badani waa wax mucaqada oo isku dhafan oo muuqaal caalamina yeesha, sabataas awgeedna waxaa lala kulmaa caqabad wayn marka lagu jiro hanaanka baadhitaankooda iyo uruurinta caddaymaha laxidhiidha;
- Nidaamkani wuxuu bartilmaameedsadaa oo kaliya nooc danbiyo oo gaara; Ma aqbalo xajmiga dhibaato ama baaxada halaag ee gaadha dhibanaha, sidaas awgeed waxaa laga yaabaa in arintaasi dhaliso in la marooriyo fasirka laga bixinayo dhacdooyinka xun xun ee taariikh ahaan dhaca;

**Khayaarka 2: Hanaan Ciqaaba dhamaan Meel ka dhacyada Xuquuqda Aadamaha.**

In lahelo caddaymo si loo caddeyo dhamaan meel ka dhacyada xuquuqda aadamaha iyo danbiyada caalamiga ah waa shaqo adag bilaabitaankeedu. Intaas waxaa sii dheer, inaad hesho istaandarka caddayn ahaan loo baahanyahay in lagu xukumo eedaysanaha way adag tahay inaad dhisto. Sababtan iyo sababo kalaba daraadood, hanaan ku koobnaada xad gudubyada waawayn wuxuu sida dhici karta sababi karaa qanac la, aan dhibanayaasha ah. Sidaas awgeed hanaanka ciqaabtu waa inuu ku koobnaado oo kaliya ka shaqaynta danbiyada heerkooda ka hooseeyo heerka lagu sheegay Khayaarka 1; Hanaanka isla xisaabtanka danbiyada ciqaabtu waa inuu si buuxda udaboolaa kiisaska laxidhiidha dilalka ka baxsan sharciga garsoorka, dhaawacyada jidhka, danbiyada ula dhaqanka si bani aadanimada ka baxsan, kufsiga iyo qaababka kale ee danbiyada laxidhiidha galmada, xidhayga iyo iska haynta sharci darada ah, qarinta qasabka ah, barokicinta qasabka ah, weerarada kusalaysan isirka, qawmiyada, diinta ama xaaladaha kale ee shakhsigu ku sugan yahay iyo meel ka dhacyada lamidka ah.

**Dhinaciisa adag**

- Wuxuu fududeeyaa isla xisaabtan wayn maadaama uu ciqaab danbiyo iyo danbiilayaal badan;

- Wuxuu si wayn uga jawaabaa dalabka dhibanayaasha ee ah inay helaan cadaalad;
- Wuxuu kahortagaa inuu danbiyada kala saraysiiyo, wuxuuna wanaajiyaa danbi kahortaga isagoo kor uqaada bajinta (Cabsi galinta danbiilayaasha mustaqbalka) ;

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan)**

- Wuxuu ka qaalib noqdaa nidaamka cadaalada danbiyada maadaamoo arimo fara badan uu nidaamkai latacaalo;
- Wuxuu hadheeyaa ama qariyaa kalisnimada ay leeyihiin danbiyada qaarkood maadaamoo hanaankani uuna diirada saarin danbiyo gaara;
- Wuxuu kordhiyaa culayska shaqo ee maxkamadaha, wuxuuna firdhiyaa khayraadkii ururisanaa taas oo badalkeeda keenta inaan kiisaska lasiin ahmiyaday lahaayeen;
- Wuxuu daahiyaa ka midho dhalinta cadaalada sababo laxidhiidha soo koobid la,aanta danbiyada lala tacaalayo awgeed; taas oo badalkeeda hoos udhigta rajada ay dadwaynuhu ka qabaan hanaankan;

### 2.2.3. Ciqaabida: Xuduuda lagu Koobayo kuwa danbiga looga shakiyo

Hanaanka ciqaabtu waa inuuna ku dhicin dabinka hal hayska ah 'Cadaalada kuwa Guulaysta. Waa inuu xayn daabkiisa soo galiyaa dhamaan masuuliyiinta dawlada iyo saraakiisha, xubnaha ciidanka qalabka sida, sidoo kale shakhsiyaadka galay meel kadhacyada kadhanka ah xuquuqda aadamaha.

Badanaa, cadaalada xiliga kala guurku maqabto in dhamaan gabood falayaasha lagu soo oogo danbiyo ciqaaba. Marka laciqaabayo kuwo badan oo kamida kuwii ka qayb qaatay ficilada danbiyada ah, waxaa haboon in sidoo kale lagu lamaaneeyo nidaamyo kale—oo ay kujiraan cafis iyo xaqiiqo raadin, marka lala tacaalayo meel kadhacyada lagalo. Suaasha wayn ee meesha taala ayaa ah, hanaankan ciqaabtu ma wuxuu xooga saari ciqaabida shakhsiyaadka galay danbiyada waawayn, mise wuxuu dacwado kusoo oogi dhamaan kuwa looga shakiyo inay galeen danbiyo.

**Khayaarka 1: Ciqaabtu waa inay bartilmaameedsato gabood falayaasha leh Masuuliyada ug wayn—kuwa amarka bixiyay, qorsheeyay ee isku duba riday ficilka ama dayaca keenay**

**in lagalo meel ka dhacyada waawayn ee ka dhanka ah xuquuqda aadamaha, oo ay kujiraan shakhsiyaadka hayay jagooyinka sarsare ee dayacoodu dhaliyay in lagalo gabood falka.**

Marka ay tahay in gabood falayaasha masuuliyada wayn leh in hawshooda lagu eego nidaamyo kale, waa in hanaanka nidaamkaasi loo adeegsado oo kaliya yaraynta xukunka dhacaya, marka xukunka lagu rido. Dhinaca kale, gabood falayaasha aan lahayn masuuliyada koowaad waa in laga saaro hanaanka ciqaabta marka ay cadaato inayna ku lug lahayn galida danbiyada waawayn, ayna ka shalaytoodeen qaybtay ku lahaayeen. Waa in si hordhac ah go, aan looga gaadho shakhsiyaadka kala noqonaya gabood falaha darajada koowaad iyo gabood falaha darajada labaad.

**Dhinaca Adag**

- Wuxuu fududeeyaa culayska shaqaalaha iyo xafiisyada ku hawlan shaqada baadhitaanka iyo oogida ciqaabida;
- Wuxuu fursad siiyaa nidaamyada kale in loo adeegsado gabood falayaasha darajada labaad ;
- Wuxuu suurto galiyaa in khayraadka xadidan ee dawlada xooga lagu saaro oo lagu ciqaabo danbiyada waawayn ;
- Wuxuu xaqiijiyaa kala guur uu isla xisaabtan saldhig uyahay;

**Khatartiisa (Dhiniciisa Jilicsan)**

- Marka gabood falayaasha loo kala saaro heerar kala duwan oo kusalaysan heerkooda ka qayb qaadasho, waxaa laga yaabaa in hanankaasi dhaliyo cabasho iyo cadho ka timaada dhibanayaasha iyo dadwaynahaba;
- Wuxuu minja xaabiyaa aragtida bajinta ama cabsi galinta maadaamoo qaar kamida gabood falayaasha loo qabanayo masuuliyada danbi;

- Wuxuu horseedaa takoor iyo dhaqdhaqaaq maamul oo keeni kara in si aan haboonayn loo adeegsado marka lasoo saarayo gabood falayaasha mudan in laciqaabo ;

**Khiyaarka 2: Ciqaabida dhamaan shakhsiyaadka ku lug leh meel ka dhacayada xuquuqda aadamaha heer kast hakaga qayb qaateene.**

Hindisida hanaankani waa mid natiijadiisu ay tahay inuu soo saaro baadhitaan dhamaystiran iyo in dacwado lagu soo oogo dhamaan shakhsiyaadkii meel ka dhacyada gaystay. Hase ahaatee nuxurka nidaamkani waa nidaam cadaaladeed oo kala guura oon si aan kula talagal ahayn ugu lug leh dhaqan galinta is-cafin iyo cafis, soo rogida ciqaabo lakala doorto, iyo yaraynta ama hoos udhigida xukunka lagu rido shakhsiyaadka shalaytooday ama raali galinta ka bixiyay khaladkii ay gaysteen.

**Dhinaca Adag**

- Yareeyaa cabashooyinka kayimaada dhibanayaasha iyo dadwaynaha maadaamoo hanaankani ay kujiraan dhamaan gabood falayaashu;
- Si wanaagsan buu jawaab uga bixiyaa dalbashada cadaalada ee dhibanayaasha;

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan)**

- Wuxuu yareeyaa diirid saarida nidaamyada kale ee cadaalada kala guurka;
- Wuxuu ka qaalib noqdaa nidaamka cadaalada danbiyada maadaamoo nidaamkan ay ku lug leeyahay dad badan oo looga shakiyay inay gabood falo gaysteen ;
- Wuxuu leeyahay taxadi ka hor imanaya farsamo ahaan iyo inuu si camali ah ufulo marka ay timaado cadaalada caruurta/dhalinyarada sharciga ka hortimaaada; marka laisku dayana, hanaankani wuxuu xaqiiq ahaan noqdaa mid yeesha dag dag iyo in laqaato go,aano isburinaya ;

### 2.3. Hay, adaha Dawlada: Yaa hogaaminaya baadhitaanka, ciqaabta iyo Hanaanka Garsoorka?

#### 2.3.1. Guud Mar

Suaal waaqiciya oo laxidhiidha isla xisaabtanka ciqaabta oo ay adeegsadaan qaab dhismeedyada cadaalada kala guurku ayaa ah yaa hogaaminaya hawlaha muhiimka ah. Booliska, hay, adaha amaanka, xeer ilaalinta iyo maxkamadaha shaqaynayay xiligii lagalay danbiyada lama ogolaan karo inay sii ahaadaan tiirarka xudunta u ah hanaanka cadaalada kala guurka iyadoon dib uhabayn lagu samayn hay, adahan.

**2.3.2. Maxkamadaha Sharciga**

Kuwa badan oo kamida wadamada dimuqraadiyada uguuraya, ciqaabida meel kadhacyada loo gaysto xuquuqda aadamaha waxaa sii dhibaateeya itaal darada nidaamayada garsoorka; sababta ugu wayn ee tani ku dhacdaana waa maxkamadaha oo aan kasoo kaban madax banaani la,aantii ay kusoo jiraan sanadaha faraha badan, hay,ad ahaan iyo waliba siyaasada halka dhinac uraran ee hal xisbi lagu hogaamiyo oo saamaysa. Shakhsiyaadka garsoorka ahna waxaa ka leexiya cadaalada ku dhaqanka eexda iyo nacaybka sabab la, aanta ah ee lagaga dhaqmo bay, ada ku nool yihiin iyo xaalada ay kujireen ee aan kor kusoo shegnay. Sabataas awgeed ayaa marar badan keenta in meel kadhacyada waawayn ee lagalo inay ciqaabaan maxkamado danbi oo caalamiya, ama, iyadooy ku xidhan xaalada wadankaasi ku sugunyahay, inay ciqaabaan Maxkamado caalamiya oo si kumeel gaadha loo dhisay (Sida ka dhacday Yuguslaafiya iyo Ruwaanda), ama waxaa lagu ciqaabaa maxkamado isku dhafan (sida ka dhacday Siiraliyoon, Bariga Timoor iyo Kaamboodhiya).

Meelaha kale (wadamo kale) waxay isticmaaleen hay, ado heer qarana iyo aqoonta cilmiga dhaqaniga ah ee umadaasi leedahay si loola tacaalo meel kadhacyadii horay loo gaystay. Tusaale ahaan, iyadoon la adeegsanayn xeel dheerayaal sharci, maxkamadaha dadwaynaha ee Gacaca ayaa laf dhabar u ahaa hanaankii dib ueheshiisiinta iyo cadaalada Ruwaanda si looga daweeyo wadanka dhaawacyadii kasoo gaadhay xasuuqii dhacay.

Itoobiya xubin Kama ah maxkamada caalamiga ah ee danbiyada ee lagu aasaasay Rooma (Heshiiska Sharciga Rooma). Intaas waxaa sii dheer khayaarada kale ee laisticmaalay heer caalami ma aha nidaam macquula oo u cuntama Itoobiya. Doorashada kaliya ee macquulka ah ee utaala waa in ladhiiri galiyo in dacwadaha lagu ciqaabayo danbiyada lagu qaado maxkamado heer qarana - oo shuruuda kuxidhan ay tahay in dib uhabayn xafiiseed lagu sameeyo; taas ooy

kujiraan garsoorayaal gaar loogu xilsaaro hanaankan gaarka ah, dhisida fadhiyo garsoor ama maxkamadeed oo gaar u ah iyo siinta garsoorayaasha iyo kalkaaliyayaashoodaba tababaro aqoon korodhsi.

**2.3.3. Baadhitaanka iyo Ciqaabida wakaaladaha**

Marka laga hadlayo doorka baadhitaan iyo ciqaabeed ee ay yeelanayaan wakaaladaha loo wakiishay shaqadan, laba khayaar ayaa inta badan lasoo jeediyaa (bandhigaa).

**Khayaarka 1: Dhisida hal koox oo ka kooban xafiisyada booliska iyo xeer ilaalinta oo masuul looga dhigo shaqooyinka baadhitaanka iyo oogida dacwadaha ciqaabta ah xiliga lagu gudo jiro cadaalada xiliga kala guurka.**

Khayaarkani wuxuu ubaahanayahay in ladhiso kooxo gaara oo laga soo qaado qaab dhismeedkii horay usii jiray si ay uhogaamiyaan, isuguna duba ridaan shaqooyinka baadhitaanka iyo oogida dacwadaha ciqaabta ah. Hanaankan waxaa kamida diyaarinta iyo siinta tababaro aqoon korodhsi oo khaasa xubnaha shakhsiyaadka ah ee ay ka koobanyihiin kooxahani- si ayna uga hoos Marin istaandarada caalamiga ah.

**Dhinaca Adag**

- Wuxuu tashiilaa khayraadka lahaysto maadaama uu isticmaalo qaab dhismeedyadii horay usii jiray;
- Wuxuu fududeeyaa kobcinta hay,adaha dawlada ee hawshan fulinaya iyadoo oo uu ku kordhinayo khibrado dheeraada;

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan)**

- Isticmaalka qaab dhismeedkii sii jiray, isagoon lagu samaynin dib uhabayn dhaba ama mid si cad loo dareemo, wuxuu suaal kakeenaa kalsoonida iyo aaminaada ay shacabku ku qabaan;

- Hanaankani wuxuu wajihi karaa caqabad, waxaana dhici karta inuu soo saaro natiijo baadhitaan oo hoosaysa maadaamoo laga yaabo in kuwa hogaaminayaa baadhitaanku ay xooga saaraan inay baadhaan danbiyada ay galeen saaxiibada ay wada shaqaynayeen ama nidaamkii ay ka tirsanaayeen;
- Arimaha laxidhiidha laxisaabtanka hay,adaha dawlada iyaga si wanaagsan looma fulin karo maadaamoo ay khatar badan tahay baadhitaanka hay,adahan dawlada ee xudunta u ahaa danbiyada sida nidaamsan loogalay ama laleeyahay waxaa galay gabood falayaal farabadan oo leh heerar kala duwan iyo wakaaladaha hay,adaha;
- Hanaanka waxaa turunturo ku noqon karaa  warbixinada lafilayo in lasoo saaro oo hoos udhigi kara maadaamoo dhibanayaashu ay ka baqayaan inay marlabaad noqdaan dhibanayaal, ayna doonaynina inay dib uxasuustaan uur kutaalooyinkii iyo xasuusihii xumaa ee ay kala kulmeen hay,adahan dawlada;

**Khiyaarka 2: Dhisitaanka Xafiis Xeer Ilaaliye oo Gaara, kaas oo isku duba rida shaqooyinka baadhitaanka iyo oogida ciqaabta.**

Nidaamkan dhamaan dacwada Laxidhiidha ciqaabta waxaa hogaaminaya xafiis xeer ilaaliye oo gaara oo arintan si khaasa loogu aasaasay. Xafiiskani wuxuu yeelanayaa baadhayaal iyo xeer ilaaliyal ugaara.

**Dhinaciisa Adag**

- Wuxuu fursad siiyaa dhisitaanka xafiis cusub oo haysta kalsooni kafiican iyo madax banaani kabadan;
- Wuxuu xaqiijiyaa hanaan dag daga maadaamoo labada shaqo ee baadhitaanka iyo oogida dacwada ciqaabtu ay ku dhacayso isla hal xafiis;
- Wuxuu u abuuraa fursad ah helida taageero dheeri ah sababta oo ah mudnaanta dheeraadka ah ee lasiinayo xafiiskan;
- Wuxuu dhiiri galin dheeraada siiyaa dhibanayaasha iyo dadwaynahu inayy taageeraan xafiiskan;
- Wuxuu sare uqaadaa lahaansha iyo laxisaabtanka hanaanka;

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan)**

- Dhisitaanka xafiis ama hay, ad cusub iyo waliba qalabaynteedu ama kaabisteedu waxay ubaahantahay wakhti badan;
- Hanaankan waxaa turunturo ku noqon kara inay adkaato helitaanka shaqaale karti iyo khibrad uleh shaqadan;
- Hanaankan inuu kobciyo qaab dhismeedkii horay usii jiray waa mid iska xadidan;
- Hanaankan wuxuu culays dheeraada kusii kordhiyaa khayraadkii dawlada ee markii horaba xadidnaa;

**2.3.4. Dib u habayno Sharci: Danbiyada ka dhanka ah Bani Aadanimada**

Sharciga ciqaabta ee Itoobiya kuma jiraan danbiyada ka dhanka ah bani aadanimada. Tani waxay ku tahay god daloolo hanaan kastoo ciqaabeed oo lagu fuliyo qaab dhismeedka cadaalada xiliga kala guurka. Sidaas awgeed waa lagama maarmaan ah in danbiyada ka dhanka ah bani aadanimada lagu soo daro xeerka ciqaabta. Talaabada noocan oo kala ahi waxay xaqiijinaysaa helida hanaan ciqaabeed oo xalaala una dhigma istaandarada caalamiga ah.

Waxaa marag madoonta ah in mabda, an ama tiirka ciqaabta ee ah inaan sharciga ciqaabta dib loo celin Karin lagu doodi doono si meesha looga saaro in lagu soo daro sharciga ciqaabta, Lana adeegsado qodob cusub oo danbi ka dhigaya ‘danbiyada ka dhanka ah bani aadanimada’. Hase ahaatee waxaa danbiga horay loogu qeexay sharciga curfiga ah ee caalamiga ah, kaas oo lagu dhaqayo meel kasta oo kamida wadan kasta. Intaa waxaa dheer, qodabka 15(2) ee Heshiiska Caalamiga ah ee kusaabsan xuquuqaha Madaniga iyo kuwa Siyaasada- waana heshiis ay Itoobiya qayb ka tahay-ayaa ogol xaalad ka reeban mabda, an oo ah in sharciga ciqaabta dib loo celin karo marka ay timaado arinta kusaabsan ficilada horay loogu qeexay inay yihiin danbiyada ka dhanka xuquuqda aadamaha sida laga dheehan karo hab dhaqanka dawladaha (oo ka dhigan inuu noqonayo sharciga curfiga ee caalamiga ah). Dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga ah ee Federaalka ayaa horay ucaddeeyay mabda, an in qodabada kusaabsan xuquqaha aadamaha ee dastuurka loo fasiro si waafaqsan heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha ee ay Itoobiya qaybta ka tahay.

Sidaas awgeed, iyadoo maskaxda lagu haynayo in cuskashada qaaciidooyinka sharci ee sharciga curfiga caalamiga ah ay wajihi karto dhibaatooyin farsamo oo laxidhiidha mudada xukunka, hadana waa suurto gal in lagu dhiirado in labilaabo dacwado ciqaabeed, Lana daydayo in xukun lagu rido doodan arinta laxidhiidha shakhsiyaadka gala danbiyada ka dhanka ah bani aadanimada.

### 2.4. Xaqiiqo Raadin

#### 2.4.1. Guud Mar

Xaqiiqo raadintu waa mid kamida tiirasha cadaalada xiliga kala guurka. Waa qaab waydiimeed ama uyaal sida suaalaha oo aan garsoori ahayn, kaas oo diirada saara sidii loo ogaan lahaa waxa ay yihiin meel kadhacyada bani aadanimada ee lagaystay iyo baaxada ay gaadhsiisantahay halaaga ka dhashay; intaa waxaa dheer waa nidaamka ugu haboon ee lagu qaato masuuliayada khaladka dhacay. Guud ahaan, waa nidaam runa oo dhaba oo kusalaysan mabada ah in dhibanayaasha, qoysaska dhibanayaasha, iyo dadwaynuhu ay xaq uleeyihiin inay runta ogaadaan. Hanaanka suurta galiya in laqaato masuuliyada meel kadhacyada iyo cadaalad darada, ayaa oofiya dalabka dhibanaha ee cadaalad raadinta, sidoo kale marka qirashada noocan oo kale ah lagu daro diiwaanada taariikhda, waxay seeska udhigaysaa dib uheshiisiin qaran.

Xaqiiqo raadintu waxay gaar ahaan taabo gal noqotaa marka loo farsameeyo, loona dabakho si dhamaystiran iyadoo lagu lamaanaynayo qaababka kale ee cadaalada xiliga kala guurka (sida Mag-dhaw siinta, dacwado oogista, cafiska, iyo dib uhabaynta hay, adaha dawlada). Koomishinada xaqiiqo raadintu waxaa laga yaabaa inayna yeelan awood dacwo oogis ciqaabeed, laakiin guud ahaan waxaa loo awood siiyaa inay soo jeediyaan ciqaab ayna ugudbiyaan diiwaankooda xeer ilaaliyayaasha. Nidaamkani waa hanaanka ay tahay inuu noqdo hanaanka cadaalada xiliga kala guurka ah ee Itoobiya qaadanayso.

#### 2.4.2. Qaybaha ugu waawayn ee Xaqiiqo Raadinta

**Qaab uu dhibanuhu xudun uyahay**: Kaqayb qaadashada dhibanayaasha ee xaqiiqo raadintu waa waxa ugu wayn ee tixgalinta lasiiyo. Dhibanayaasha iyo dadka kale ee waxyeeladu gaadhay

waa in lasiiyo fursad ay kaga qisoodaan sheekooyinkooda (Kaga sheekeeyaan dhibkii ku dhacay). Intooda badan koomishinada xaqiiqo raadinta looma awood siiyo oo kaliya inay ilaaliyaan kuwa badbaaday iyo dhibanayaasha, waxay sidoo kale bixin karaan adeegyo muhiim ah-oo ay kujiraan taageero caafimaad, mid bulsheed iyo mid dhimirba. Xaaladaha qaarkood, waxay qaataan awooda ah inay u raadiyaan xal waara shakhsiyaadka si xooga ama qasaba lagaga saaray ama baro kiciyay hoygoodii/guryahoodii.

**Kaqayb qaadashada kuwa looga shakisanyahay inay gabood faleen:** Kaqayb galida hanaank ee gabood falayaashu waxay ahmiyad wayn uleedahay in fahan buuxa laga qaato wixii dhacay. Si looga helo wixii dhacay sawir buuxa, waxaa lagama maarmaan ah inaan lagu ekaan oo kaliya maraga ay bixiyaan dhibanayaashu laakiin lafasiro raad walba. Marka lagu gudo jiro Xaqiiqo raadinta, marag furida gabood falayaasha laga shakiyo waxay gaar ahaan ahmiyad wayn leedahay marka lawaayo dhibanayaasha. Kaqayb qaadashada kuwa looga shakisanyahay inay gabood faleen hanaanka xaqiiqo raainta waxay keeni kartaa in la ogaado qorshayntii, isku duboridkii iyo ujeedadii danbiyadii lagalay iyo qaabkii ay ushaqaynaysay xukuumadu. Waxaa kaloo loo isticmaali karaa hab lagu ogaado halka ay ku sugan yihiin shakhsiyaadka lawaayay ama lahelo qubuurihii dadka lalaayay ama laxasuuqay lagu duugay.

**Diikumenti garaynta (Diiwaan galinta) Meel kadhacyada:** Diikumenti garayntu waxay gacan kagaysataa in lagu baraarugo xad gudubyadii dhacay, waxay damaanad katahay inayna dib usoo noqon, iyo inay kahortagto in ladafiro xad gudubyada mustaqbalka. Sababtaas awgeed koomishinada xaqiiqo raadintu waxay inta badan uruuriyaan caddaymo xad dhaafa-oo ay kujiraan marag furid, caddaymo diikumenti ah iyo muuqaalo fiidyawya ah.

**Faafinta Runta:** Hanaanka xaqiiqo raadintu kuma joogsado diikementi garaynta; ee waxaa kujira faafinta runta iyo aqbalaada halaagii ku dhacay dhibanayaasha.

### 2.4.3. Xafiisyada: Yaa Hogaaminaya Xaqiiqo raadinta?

Hanaanka xaqiiqo raadintu wuxuu ka koobanyahay hadalo/sheekooyin laga soo qaaday dhibanayaashii iyo gabood falayaashii iyo fudaydinta dhagaysi dadwayne. Qaab dhismeedyada

loo baahanyahay inay fuliyaan hanaankan waxay noqon karaan mid kamida qaababkan soo socda.

**Khayaarka 1: Koomishinka Dib Uheshiisiinta iyo Xaqiiqo Raadinta**: Dhisida koomishinada xaqiiqo raadinta si ay u hogaamiyaan hindisaha xaqiiqa raadinta waa hab dhaqan guud. Waayo aragnimada laga helay wadamo badan waxay muujinaysaa in koomishinada noocan oo kale ah lagu aasaaso bayaano (Koonfur Afrika), loona dhiso inay jiraan mudo xadidan (Inta badan 1-3), digreeto hay, ad fulineed (inta badan koomishinada Laatiin Ameerika iyo Marooko, ama go,aan garsoor (Kanada). Itoobiya Bayaan baarlamanku soo saaro in lagu aasaaso ayaa heli Kara kalsooni, taageero siyaasadeed iyo awooda xafiiseed ee koomishinku yeelanayo. Hase ahaatee bayaanka noocan oo kale ah waa in laga sii horaysiiyaa wadatashiyo lala sameeyo bulshada ra, yidka ah (CSOs), xisbiyada siyaasada, dadwaynaha, iyo bahwadaagta kale. Horay ubilaabida wadatashiyadu waxay ahmiyad uleedahay kor uqaadida kalsoonida lagu qabi karo, madaxbanaanida iyo taabo galnimada koomishinka.

**Dhiniciisa Adag**

- Wuxuu xaqiijiyaa taabo galnimo maadaamoo xaqiiqo raadintu ujeedadeedu tahay cafin-siin iyo dib ueheshiisiin kusalaysan runtii iyo xaqiiqdii la,ogaaday;
- Wuxuu haystaa kasooni wayn sababo laxidhiidha madax banaanida hay,ada ama xafiis ahaan, eex la,aanta iyo hanaankiisa kaqayb galinta dhamaan wuxuu udhigmaa sida shaqo ay dad isku xirfad ahi qabanayaan maaadaamoo hay,adan ama xafiiskan awooda lasiiyay laga yaabo inuu soo jiito inay shaqaale unoqdaan xeel dheerayaal;
- Fagaarahan xafiis ee sidan oo kala ah ayaa ku haboon ujeedooyinka cadaalada xiliga kala guurka; waxaa qayb ka ah cafis, ka qayb qaadashada dhibanayaasha iyo gabood falayaasha, qaabilaada cabashooyinka, qaban qaabinta kulamo, iyo daah ka qaadida, diikumenti garaynta iyo faafinta runta;
- Wuxuu wax kataraa bogsiinta dhibanayaasha maadaama uu inta badan kutiirsan yahay maragyada lafuray ; wuxuu sidoo kale dhaliyaa aqoonsashada dhibanayaasha loo

aqoonsado dad ahaan kadib mudadii dheerayd ee ay kusoo jireen xaqiraada bulsheed iyo shakiga;

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan)**

- Hindisahan oo kale wuxuu ubaahanyahay inuu ka faaiidaysto khayraad dawladeed oo farabadan
- Itoobiya koomishin limada ayaa latijaabiayay, wuuna guul daraystay

**Khayaarka2: Koomishinka Xuquuqda aadamaha Itoobiya ama Koomishinka wada heshiisiinta Qaran:** Khiyaarka noocan oo kale ah ee siyaasadeed wuxuu ubaahanyahay in lasameeyo dib uhabayn sharci si loo kordhiyo awooda iyo waajibaadka hay, adahan.

**Dhiniciisa Adag**

- Wuxuu tashiilaa khayraadka maadaamoo looga faaiideeyay hay,ado ama xafiisyo horay usii jiray;
- Wuxuu fududeeyaa kobcinta awoodeed ee hay,adeed ee qabashada hal hawl oo kaliya;

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan)**

- Waxaa yaraanaya taabo galnimada hanaankan maxaa yeelay hay,adahan ama xafiisyadan waxaa horay loo siiyay awoodo iyo masuuliyado waawayn;
- Hay,adahan ama xafisyadan waxaa soo wajahaya itaal daro ah inay fuliyaan hanaan mucaqada (isku dhafa) oo loo dhanyahay oo xaqiiqo raadina;

## 2.5. Dib Uheshiisiin

### 2.5.1. Guud Mar

Mid kamida ujeedooyinka hanaanka cadaalada kala guurku waa in lagaadho hanaan dib uheshiisiin. Dib Uheshiisiintu waa in laisu keeno bulshooyinkiii kala irdhoobay ee ay kala qaybisay meel kadhaca baahsan ee xuquuqda aadamaha, dagalada, khilaafka/isku dhacyada, cadaalad darada ay dhalisay isku dhaca bulsheed, nacaybshaha/karaahiyada iyo cabsida- iyo in lasuurto galiyo inay bilaabaan wadadii dib udhiska iyo mustaqbal wadaag.

Marka la dhaqan galiyo nidaamka cadaalada xiliga kala guurka, dib uheshiisiinta waxaa loo fahmi karaa ama hanaankii wax lagu gaadhayay ama hadafkii loo socday. Marka loo arko inuu yahay hanaan wax lagu gaadhayo, waa mid cumuq dheer, mudo dheer qaata, dadban iyo hanaan isbadbadala kaas oo keena cadaalad waarta iyo is afgarad.

Doorka gaarka ah ee hanaanka dib uheshiisiintu wuxuu kuxidhanyay kolba xaalada gaarka ah ee lagu suganyahay. Wadamada sida Itoobiya oo kale ah ee ay ragaadiyeen tacadiyada iyo meel kadhacyada waawayn ee ka dhank ah xuquuqda aadamuhu, waa in hogaamiyaasha bulshadu ama shakhsiyaadka ay sida xun usaamaysay meel kadhacyadu, ay qaataan doorka ugu wayn ee hanaanka.

Dib uheshiisiin macnaheedu ma, aha in qofka danbiga galay labari yeelo. Hadaan sikale udhigno,  dib uheshiisiintu kama dhigna waxaa latuurayaa danbigii loo haystay gabood falaha. Macnaheeda dhabta ahi waxaa weeye in lagu lamaaneeyo nidaamyada kale: sida xaqiiqo raadinta, cafiska, mag-dhaw siinta, nabad dhisida iyo cadaalad horgaynta. Hanaanka Dib uheshiisiintu waa inay kulug yeeshaan in laqaato/aqbalo masuuliyada khaladka lagalay iyo inay ka shalaytoodaan gabood falayaashu, dhibanayaasha oo aqbala raali galinta iyo lagu wada noolaado daganaansho kudhisan go, aano sharci lagu gaadho.

### 2.5.2. Noocyada Dib Uheshiisiinta Cadaalada Kala Guurka

Dib uheshiisiintu waxay qaadataa noocyo kala duwan. Markaan eegno xaalada Itoobiya, waxaa muhiim ah in laga fikiro xaaladahan soo socda mustaqbal kasta oo laisku dayayo cadaalada xiliga kala guurka oo uqaadata dib uheshiisiin mid kamida tiirasheeda.

**Dib uheshiisiin nafeed ama shakhsiyeed:** Hadii gabood falayaasha ay ka go, antahay inay dib uheshiisiin dhaba lagalaan kuwa kale, waa inay marka hore naftooda laheshiiyaan. Waa in

lasameeyo oo ladhaqan galiyo barnaamujyo dib loogu kabayo dhibanayaasha kaas oo ka taakulaynaya dhaawacii dhimiri-nafsiyeed iyo jidhba.

**Dib uehshiisiin naf/dib uheshiisiin shakhsiyeed:** Tani waxay diirada saartaa xidhiidhka ka dhexeeya dhibanaha iyo gabood falaha heerka koowaad iyo ama gabood falaha heerka labaad; waxaa kujira qaadashada aama aqbalaada cadaalada daradii dhacday, oo ah dareen muujinaya isa sixid iyo raali galin.

**Dib Uheshiisiin Siyaasadedd iyo Bulsheed:** Hanaankan wuxuu ku lug leeyahay dib uheshiisiinta qawmiyadaha, bulshada, diimaha, siyaasadaha ama kooxo kale iyadoo la aqoonsanayo dhibaatadii lagaystay; waxay diirada saartaa ujeedada ah dhisitaanka mustaqbal lawadaago oo kusalaysan isxushmayn, kaas oo si wayn dhinaca usaaraya nidaamyada diiniga iyo dhaqanka ah ee xalinta khilaafka.

**Dib Uheshiisiin Hay, adeed/Xafiis:** Hanaankani wuxuu diirada saaraa in hay, adaha/xafiisyadu dawladu noqdaan kuwa lala xisaabtamo, arintanina waxay ubaahantahay in laga hirgaliyo xafiisyada dawlada dib uhabayn. Bartilmaameedyada ugu waawayna waa xafiisyada leh masuuliyada xushmaynta, ilaalinta iyo kafaalo qaadida xuquuqda aadamaha, waana kuwa kaciyaara door muhiim ah cadaalada xiliga kala guurka. Faragalinta noocan oo kale ahina waxay wax katartaa soo celinta kalsoonida bulshada ee xafiisyadan.

**2.5.3. Ha’yadahee: Yaa hogaaminaya Hanaanka Dib Uheshiisiinta?**

Hanaanka Dib uheshiisiintu waa qayb dhamaystirta hanaanka wayn ee sidoo kale kakooban ciqaabta, xaqiiqo raadinta iyo cafiska. Taas oo kadhigan in hanaanka dib uheshiisiinta laisku dayi karo iyadoo laqaadanayo mid kamida wakaaladaha soo socda.

**Khayaarka1: Koomishinka Dib Uheshiisiinta iyo Xaqiiqo Raadinta:** Hab dhaqanka ugu wanaagsani waxay muujinaysaa in dib uheshiisiinta sida ugu wanaagsani tahay inuu hogaamiyo xafiis loo aasaasay inuu fuliyo hanaan dhamaystiran oo ah cadaalada xiliga kala guurka. Marka loo yimaado Itoobiya, waxaa haboon in loo dhiso koomishinka xaqiiqo raadinta iyo dib uheshiisiinta oo ah mid madax banaan oo bari ka ah eex si uu fuliyo shaqada noocan oo kale ah.

**Dhinaciisa Adag**

- Wuxuu xaqiijiyaa taabo galnimo wanaagsan maadaamoo dib uheshiisiintu ay tahay mid kamida tiirarka ugu waawayn ee hanaanka cadaalada kala guurka;
- Wuxuu helayaa kalsooni buuxda sababo laxidhiidha madax banaanidiisa iyo eex la,aantiisa iyo hanaankiisa ogol ka qayb qaadashada
- Waxaa laga yaabaa inuu noqdo xafiis ay dad isku xirfad ahi qabanayaan shaqadiisa maaadaamoo dhici karto inuu soo jiito shaqaale xeel dheerayaala;

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan)**

- Dhisida xafiis cusubi waxay ubaahan tahay khayraad dawladeed oo farabadan;
- Waxaa horay loo tijaabiyay oo fashilmay koomishin lamida;

**Khayaarka 2:** Koomishinka Wada tashiga ee heer qaran: In lamiciinsado khayaarkan oo kale waxay ubaahantahay in sharciga wadanka wax laga badalo, gaar ahaan waxaa loo baahan in xafiiskan oo kale lasiiyo awooda dheeriya.

**Dhinaciisa Adag**

- Wuxuu tashiilaa khayraadka dawlada;
- Wuxuu ka faaiidaystaa kalsoonida lagu qabo xafiisk maadaamoo xafiiskan loo dhisay inuu noqdo mid madax banaana oo bari ka ah eex;

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan)**

- Hanaankani waxaa laga yaabaa inuu taabo gal noqon waayo marka la eego masuuliyadaha iyo culaysyada badan ee horay loo saaray;
- Wuxuu ubaahan yahay dib uhabayn lagu sameeyo sharciga wadanka taas oo laga yaabo inay sanado badan qaadato;
- Siinta awoodaha noocan oo kala ahi waxay keeni kartaa walaac ah inay ka horyimaadaan moodeelada istaandarka ah ee heer caalami;
- Moodeelkani waxaa laga yaabaa inuu yeesho god daloolooyin ku saabsan hanaanka laisugu duba ridayo nidaamyada kale ee cadaalada xiliga kala guurka;

**Khayaarka 3: Isku dayga ah samaynta hanaan dhamaystiran, isku duba ridan oo ah cadaalada xiliga kal guurka:** Xaqiijinta isla xisaabtanka, xaqiiqo raadinta, qaadashada ama aqbalaada khaladkii dhacay iyo talaabooyinka dib uhabaynta xafiiseed waxay dhamaantood ahmiyad uleeyihiin hanaan dib uheshiisiineed oo dhamaystiran. Sidaas awgeed, waxaa lagu gunaanadi karaa dooda in dhamaan qaybaha hanaanka cadaalada xiliga kala guurku ay keento dib uheshiisiin. Sababtaas awgeed, dhamaan qaababka, iyo talaabooyinkaba waxaa loo habayn karaa, isku dubaridi karaa, awoodna loo siin karaa inay keenaan hanaankan oo kale.

**Dhinaciisa Adag**

- Fursada ah inuu Moodeelkani guulaysto waa mid aad usaraysa maadaamoo uu adeegsanayo dhamaan qaybihii ugu waawaynaa ee cadaalada xiliga kal guurka;
- Wuxuu ku fiicanayahay inuu unoqdo dhamaystir qaybaha kale ee cadaalada xiliga kala guurka;

**Dhinaciisa Adag:**

- Waxaa jirta yididiilo aad u sareysa inuu guuleysan karo nidaamkani, maadaama uu ka shaqeysiinayo dhamaan unugyada muhiimka ah ee hanaanka Kala-guurka Cadaaladeed

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Waxaa lagala kulmi doonaa caqabado ay sabab u yihiin jiri'taan la'aanta hay'ado iyo hab-raacyadii isku xidhi lahaa dhamaan unugyada muhiimka ah

**2.6. Cafiska**

**2.6.1. Guud Mar**

Hanaanka cafisku waa mid ka mid ah noocyada nidaamka loo adeegsado xaaladaha geedi-socodka nidaamka kala-guurka cadaaladeed-kaalinta uu cafiisku ka qaato dhismaha nabada,

kahortaga rabshadaha, iyo bogsiinta (boogo-dhayista) bulshada, waa arrin la wada aqoonsan yahay. Hase yeeshee, hanaanka cafiisku wuxuu midho dhal noqon karaa oo keliya hadii loo adeegsado/dhaqan geliyo si wanaagsan. Bixinta cafiis aan shuruud laheyn, wuxuu horseedayaa cadaalad darro, ciqaab la'aan, dhibanaha oo dareema difaac la'aan, iyo inay dhiiri geliso xadgugubyo mustaqbalka dhici kara. Xeerarka/Aaaladaha Xuquuqda Aadamaha caalamiga ah iyo kuwa heer goboleedba, waxay si cad u xusayaan in cafiisyada loo fidiyo shaqsiyaadka ku lug leh/ka qeyb qaata xadgudubyada/dembiyada waaweyn ee ka dhanka ah xuquuqda aadamaha ay meel ka dhac ku yihiin waajibaadyada xuquuqda aadamaha

Itoobiya gudaheeda, looma fidin karo cafis aan shuruud laheyn shaqsiyaadka ka qeyb qaatay tacadiyadii horey usoo dhacay. Awooda uu dalku ku cafin karo xadgudubyada, inta lagu guda jiro geedi-socodka nidaamka kala-guurka cadaaladeed, waxaa lagu xusay Qodobka 28 Dastuurka JDFI, kaasoo xeerinaya inay jiraan dembiyo aan la cafin karin. Hase yeeshee, waxaa lawada ogsoon yahay in Itoobiya gudaheeda uu hanaanka cafisku uu qeyb ka yahay nidaamka kal-guurka cadaaladeed, lana bixin karo cafis hadii la fulliyo shuruudaha gaarka ah eek u cad xeyn-daabyada Dastuurka iyo Xeerarka Caalamigia ah.

Nidaamka kala-guurka cadaaladeed, waa inuu si aan shaki ku jirin u qeexaa shuruudaha iyo xaaladaha lagu dhaqan gelinayo hanaanka cafiska. Hay'adaha/Laamaha u xilsaaran, waa inay geedi-socodka hanaanka cafiska u dhaqan geliyaan hab cad-cadaan iyo dhex-dhexaadnimo ku jirto

### 2.7.2. Shuruudaha iyo Xaaladaha lagu Bixiyo Cafiska

Waaya-aragnimadu waxay ina tusinaysaa in arrimaha soo socda ay tahay in la tix gerliyo marka la bixinayo cafis:-

- Ka Qeyb qaadasho:- Debciga iyo culeyska dembiga: ka qeyb qaadashada dembigu waa mid ka mid ah arrimaha mudan in la tixgeliyo; bixinta cafisku, waa inaysan horseedin ciqaab la'aanta xadgudubyada/dembiyada waaweyn ee ka dhanka ah xuquuqda aadamaha
- ***Ka Qeyb-gelinta Xad-gudbayaasha:-*** Geedi-socodka hanaanka cafiska, waxaa loo baahan yahay in iskaashi dhow lala yeesho xad-gudbayaasha (dembiilayaasha), kuwa khaladka sameeyay waa laga qeyb geliyaa guud ahaan geedi-socodyada nidaamka kala-guurka cadaaladeed, lana xaqiijiyaa shuruud ama xaalad kasta oo ay shaqsiyaadkan xadgudubyada sameeyay ku muteysan karaan ka faa'iideysiga hanaanka cafiska
- ***Xaqiiqo-Raadin (truth finding):-*** Hanaanka cafisku wuxuu kaalin muhiim ah ka qaataa geedi-socodka xaqiiqo raadinta. Xad-gudbayaashu, waa inay gacan siiyaan nidaamka kal-guurka cadaaladeed, iyagoo faah-faahin ka bixinaya qaababka dembiyada loo galay (diyaar-garowga, qorsheynta, ujeedada, duruufaha, iwm)
- ***Qoomameyn iyo Raali-gelin:-*** Iyadoo ay sidooda u jirayaan magdhowyada kala duwan ee la siinayo dhibanayaasha, hadana inta lagu guda jiro geedi-socodyada nidaamka kala-guurka cadaaladeed dhexdiisa, guud ahaan bulshada iyo gaar ahaan dhibanayaashu, waxay u baahan yihiin in loo damaanad qaado inaysan mar labaad soo noqonin dembiyo noocan oo kale ah. Xad-gudbayaashu, waa inaysan qoomameyn keliya la imanin, balse waa inay raali-gelin buuxda siiyaan dhibanayaasha
- ***Iskaashi:***- Xad-gudbayaashu, waa inay gacan siiyaan hay'adaha cadaalada, kana qeyb-qaataan hawlaha dibu-dejinta/dhaqan-celinta, iyo geedi-socodyada kala-guurka cadaaladeed, dib-u-soo celinta hantidii ay qaateen, kana qeyb galaan bogsiinta dhibanayaasha, iwm

### 2.7.3. Hay'adaha: Yaa Bixinaya Cafiska?

Iyadoo ay jiraan Debciga iyo qaab-dhismeedk hay'ada, geedi-socodka hanaanka cafiska, hadana sharciyada hay'ada iyo kalsoonida lagu qabi karo, ayaa ah arrimaha kale ee muhiimka ah. Sidaas darteed, noocyadan doorasho ee soo socda ayuu dalku xulan karaa si uu u yeesho hay'ad u xilsaaran bixinta cafiska:-

**Khayaarka 1aad**:-Aasaasida Komishinka Xaqiiqo-raadinta iyo Dib-u-heshiisiinta:- Tani waa dhisida hay'ad madax banaan oo dhex-dhexaad ah, taasoo hormuud ka noqoneysa xaqooqo-raadinta iyo cadaalad helista. Qaab-dhismeedka noocan ah wuxuu si wanaagsan uga fulay/dhaqan galay dalal dhowr ah

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Wuxuu si dhab ah u buuxinayaa ujeedooyinka xaqiiqo-raadinta iyo dib-u-heshiinta looga dan leeyahay hanaanka cafiska
- Wuxuu suurto geliyaa dhismaha hay'ad awood ley, iyadoo la isu keenayo khabiiro xeel-dheerayaal ku ah mawduuca
- Wuxuu xaqiijyaa hirgelinta geedi-socod lagu kalsoon yahay, maadaama hay'adani u qaabeysnaan doonto hab madax-banaan, dhex-dhexaad ah, yeelan doontana fagaareyaal loo dhan yahay
- Wuxuu xad-gudbayaasha ku dhiiri gelinayaa ka qeyb-qaadashada geedi-socodka nidaamka kala-guurka cadaaladeed
- Wuxuu si buuxda ula mid yahay shuruudaha khuseeya hanaanka cafiska (dejinta shuruudaha, dhageysiga codadka dhibanayaasha, iyo fullinta shuruurdaha muhiimka ah)

**Khatatiisa (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Wuxuu culeys dheeri ah saarayaa kheyraadka xadidan ee dawlada
- Nidaamkan markii la tijaabiyey, wuu guul-dareystay

**Khayaarka 2aad**:-Addeegsiga Sharciga iyo Qaab-dhsimeedka Hay'ado horey usii jiray:-Habkan wuxuu ku saleysan yahay geedi-socodyada ay raacaan wasaaradaha cadaalada iyo Boordhiyada

cafisku, kaasoo waaafaqsan ujeedooyinka danaha dadweynaha/bukshada ee lagu qeexay Bayaanka Tirsigiisu yahay 1089/2018. Wasaarada Cadaalada ayaa soo xuleysa shaqsiyaadka muteystay ee u qalma in la cafiyo, kadibna waxay xogta u gudbinaysaa Boordhiga Cafiska, iyadoo uu Boordhiguna soo jeedin u gudbinayo Ra'iisul-wasaaraha oo isagu gaadhaya go'aanka kama danbeysta ah

**Dhinaca Adag:-**

- Waxaa la adeegsadaa hay'ado horey usii jiray, taasina waxay badbaadinaysaa kheyraadka Qaranka
- Wuxuu fududeeyaa kobcinta awooda hay'adeed ee raadadka dhismaha horey usii jiray

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Waa mid aan raacin geedi-socodka iyo nuxurka nidaamka kala-guurka cadaaladeed. Sidaas darteed, wuxuu u nugul yahay inuu guul-daretsto
- Waa mid aan buuxinayn aragtida/ujeedada nidaamka kal-guurka cadaaladeed, maadaama uusan laheyn fagaare loo dhan yahay oo lagu maareynayo xaalado iyo duruufo aad u murugsan
- Waxaa ka hor imanaya caqabado la xidhiidha kalsoonida lagu qabi karo iyo sharciyadiisaba
- Wuxuu xad-gudbayaasha ka niyad jebiyaa inay ka qeyb qaataan geedi-socodka

### 2.7.4. Xaaladaha Cafiska uu Sharcigu Ogol yahay

Dastuurka JDFI, wuxuu mamnuucayaa in cafis ama saamaxaad loo fidiyo shaqsiyaadka galay dembiyada ka dhanka bini'aadanimada, sida; Gumaadka, Dilka Sharci-darrada ah, waayitaanka qofka lagu qasbo (forced disappearance), iyo Jidh dilka (Qod.28). Dembiyadaas la xusay waa kuwo sida caadiga ah/inta badan lagu xaliyo geedi-socodyada nidaamka kala-guurka cadaaladeed. Hadaba, waxaa loo baahan yahay in taxadar haboon laga sameeyo inaan la dejinin ama la dhaqn gelinin talaabooyin ka hor imanaya Datuurka dalka

Sida aynu kor kagasoo hadalay, waxaa jira xeyn-daabyo aan laga gudbi karin oo ku xusan xeerarka caalamiga ah- gaar ahaan- kuwa ku saabsan in cafis shuruud la'aan ah aan loo fidin karin shaqsiyaadka lagu tuhunsan yahay inay galeen dembiyo caalami ah. Hase yeeshee, xeyn-daabyada noocan ah waxay dhaqan gal ku yihiin duruufaha iyo xilliyada caadiga ah, balse kuma haboona xaaladaha/duruufaha kalifaya ama lagu qasban yahay in la sameeyo nidaamka kala-guurka cadaaladeed. Iyadoo laga duulayo aragtidaas, waxaa xusid mudan in waajibaadkii dawladeed ee ahaa inay oogto oo ay dacwad ciqaab ah kasoo gudbiso xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadamaha aan si dadban looga tanasulayo, hadii ay dawladu dejiso/diyaariso nidaamyo gaar ah oo ku wajahan xal-u-helida dhibaatooyinka heer qaran, kahortaga dembiyada, ama damaanad-qaad ku aadan inaysan mar kale dhicin dembiyo noocaas oo kale ah

Siyaasada Afrika ee nidaamka kala-guurka cadaaladeed, waxaa si cad loogu xusay inay mamnuuc tahay fidinta cafis shuruud la'aan ah oo xakameynaya amah or istaagaya xuquuqaha dhibanayaasha, si ay u ogaadaan xaqiiqada una helaan cadaalad.

Waxaa lagama maarmaan ah, in dejinta iyo dhaqan gelinta geedi-socodka hanaanka cafiska ee ku saleysan xaaladaha gaarka ah, isla markaana fududeynaya xaqiiqo-raadinta, iyo xaqiijinta bogsiinta/magdhowga-uu waafaqsan yahay Dastuurka iyo Xeerarka Caalamiga ah.

Dastuurka federaalkana waa in loo turjumaa/macneeyaa hab la socon kara nuxurka guud ee xeerarka caalamiga ah iyo siyaasada qaaradeed ee Afrika. Sidaas darteed, turjumida dastuurka ama wax ka badelka mustaqbalka iman kara, waa in hanaanka cafisku uu ahaadaa ama loo tixgeliyaa mid ka mid ah mawduucyada muhuumka ah ee mudnaanta la siinayo

## 2.8. Magdhowyada

### 2.9.3. Guud Mar

Guud ahaan, adeegsiga geedi-socodka magdhowgu, wuxuu ku saabsan yahay in la bixiyo magdhow macquul ah oo u dhigma waxyeelada la geystay, kaasoo noqon kara cadad lacageed iyo/ama mid aan lacag aheyn, iyo ama dib-u-soo celin, iyo/ama dib-u-dejin (Qaan-dhabid)- Ujeedada ugu muhiimsan ee geedi-socodkani waa inuu gacan ka geysto hanaanka bogsiinta iyo hagaajinta dabeecada dhibanayaasha iyo xad-gudbayaasha

Inta laga warqabo, nidaamyada laga hirgeliyay dalka Itoobioyailaa wakhtigan aynu ku jirno, arrinta magdhowga looma tixgelinin inay ka mid tahay ujeedooyinka nidaamka kala-guurka cadaaladeed. Tanina waxay horseeday inay dhibanayaashu waayaan cadaalad. Marka laga hadlayo nidaam kala-guur cadaaladeed oo sharciga ku dhisan- Dejinta siyaasad qoto-dheer, isku-dubaridida kheyraadka iyo qorshaha qoondada miisaanayadeed; iyo xulashada xaaladaha gaarka ah ee ay dhibanayaashu ku heli karaan magdhowyo ku fulan, wax-ku-ool ah, isla markaana deg-deg ah- ayaa loo arkay inay lagama maarmaan u yihiin guud ahaan nidaamka, si loo helo cadaalad

### 2.9.4. Qaababka Magdhowyada ee Nidaamka Kala-guurka Cadaaladeed

***Dib-u-soo celin:-*** Habkani, wuxuu ka kooban yahay dadkii barakacay in guryahooda lagusoo celiyo, shaqadii oo dib loogu celiyo, magdhow ku aadan fursadaha shaqo ee ka lumay, ama dib-ugusoo celinta hantidii laga qaatay. Talaabooyinkani waxay u baahan yihiin inay dawladu gudato waajibaadkeeda, sidoo kale geedi-socodku wuxuu u baahan yahay kharashyo dheeri ah, si looga midho dhaliyo ujeedooyinkii loo aasaasay

***Magdhow:-*** Waa qeyb ka mid ah in la siiyo faa'iido u dhiganta waxyeelada soo gaadhay-(cadad lacageed ama alaab/qalab)- dhibanayaasha loo geystay xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadamaha. Waxay noqon kartaa dib-u-dhis, fursad shaqo, ama gunada hawl-gabka oo lasiiyo, ama lacago kale. Iyadoo ay dawladu u qoondeynayso miisaaniyad, hadana xad-gudbayaasha iyo cid kasta oo ka faa'iideystay falalka xadgudubyada iyo cadaalad darrada ah ee la galay, waa inay bixiyaan qeybtooda kaga aadan magdhowga

***Qanaca:-*** Waxaa lagu heli karaa qancinta dhibanayaasha arrimaha ay ka mid yihiin fullinta hawlaha xaqiiqo-raadinta, ka garaabida/aqoonsiga waxyeelada loo geystay, raali-gelin muuqata oo la wada ogyahay, in si haboon dib loogu aaso/xabaalo dadkii dhintay, munaasabado lagu xusayo, iyo la sameeyo magdhowyo kale oo macnawi ah (aan aheyn lacag ama alaab/qalab)

***Dib-u-dejin:-*** Waxaa ka mid ah hirgelinta adeegyada aasaasiga ah sida, daaweynta, dabiibka cilmi-nafsiga, iyo adeegyada la xidhiidha, iyadoo la fullinayo qorsheyaal lagu dhisayo xarumaha laga taakuleeyo dhibanayaasha

***Magdhow Bulsheed:-*** Waxaa ka mid noqonaya dib-usoo celinta dhulka bulshada ka wada dhaxeeyay, iyo dib-u-dhiska adeegyada caafimaadka, waxbarashada, nabad geliyada, cadaalada, iyo adeegyada kale ee bulshada sida; kaabayaasha dhaqaalaha iyo arrimaha lagama maarmaanka u ah nolol-maalmeedka bulshada

### 2.9.5. Hawlaha Muhiimka ah ee Dhismaha Hanaanka Magdhowga

***Sharciyada Magdhowga:-*** Aasaasida barnaamij magdhow oo mudnaan siinaya dhibanayaasha loo geystay xadgudubyada waaweyn ee ka dhanka ah xuquuqda aadamaha, waa inuu ku saleysnaadaa hanaan sharci oo si cad uga turjumaya. Sharcigani, waa inuu si gaar ah u xeeriyaa noocyada iyo cadadka magdhowyada kala duwan, xaaladaha bogsiinta, qeexitaanka dhibanayaasha, iyo arrimaha kale ee la xidhiidha

***Aqoonsiga/soocida Dhibanayaasha ka Faa'iideysanaya***:- Hirgelinta hanaan lagu aqoonsanayo/soocayo dhibanayaasha ka faa'iideysanaya barnaamijka magdhowga, waa mid aaad muhiim u ah, maadaama aysan suurto gal noqon doonin in la helo nidaam ay dhamaan dhibanayaashu magdhowyo kuwada heli karaan. Ujeedooyinka nidaamka kala-guurka cadaaladeed, waa inay jiraan hab-raacyo loo marayo baadhitaanada lagu aqoonsanayo/soocayo dhibanayaasha

***Ka Qeyb-qaadashada Xad-gudbayaasha ee Hanaanka Magdhowga***:- Kasokow ka qeyb qaadashada arrimaha xaqiiqo-raadinta iyo raali-gelinta, barnaamijka waa in lagu qaabeeyaa hab

ay xad-gudbayaashu kaga qeyb qaadanayaan oo ay wax ku darsanayaan hanaanka magdhowga oo ku haboon xaaladaha bogsiinta, iyo/ama deeq ay siinayaan barnaamijka magdhowyada

***Sanduuqa Taakuleytnta Dhibanayaasha***:- Sameynta sanduuq isku dubarida, uruuriya isla markaana yeesha qoonde-miisaaniyadeed- waa mid lagama maarmaan ah, si loo fuliyo qorsheyaaal mideysan oo ka jawaaabaya hirgelinta hawlaha dibu dejinta iyo hanaanka magdhowga, kaasoo buuxinaya hal-beegyada caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha- arrintani waxay si gaar ah ugu haboon tahay dalalka soo koraya sida; Itoobiya ee uu kheyraadku caqabad ku noqon karo hirgelinta hanaanka magdhowyada oo baaxad leh. Sidaas darteed, hay'ada loo igmaday ee awoodaha sharci u leh kormeerka, waa inay sameysaa sanduuq dhaqaale

### 2.9.6. Hay'ada: Yaa Hogaaminaya/xidhiidhinaya Hanaanka Mogdhowyada?

Marka laga hadlayo hay'ada u xilsaaran, waayo-aragnimooyinka jira way kala duwan yihiin, waxaana lakala dooran karaa noocyadan soo socda, si looga jawaabo sua'aalaha muhiimka ah ee ay ka mid yihiin Yaa Hogaaminaya Geedi-socodka Magdhowyada? Sidee loo bixinayaa? Qofkee la siinayaa Magdhowga?

***Khayaarka 1aad:- Komishinka Xaqiiqo-raadinta iyo Dib-u-heshiisiinta:-*** Waayo- aragnimada laga helay dalal badan, waxay muujinaysaa in komishinka xaqiiqo-raadinta, dib u heshiisiinta iyo magdhowyada, loo xilsaaro awood sharcina loo siiyo inuu hogaamiyo geedi-socodka soocida/aqoonsiga dadka ka faa'iideysanaya, diyaarinta noocyada magdhowga, iyo soo jeedinta qaababka ku haboon bogsiinta oo isku-dhaf ah. Nidaamka noocan oo kale ah waa lagu dabakhi karaa xaalada dalka Itoobiya

**Dhinaciisa Adag:-**

- Wuxuu xaqiijinayaa waxqabadka sare ee geedi-socodka, madax-banaanida hay'ada, wuxuuna fududeynayaa in si sahlan loo hogaamiyo hanaanka magdhowyada baaxada leh isla markaana murugsan

- Wuxuu damaanad qaadayaa ka midho dhalinta barnaamijka, sababtoo ah masuuliyadaha kale ee komishinka ayaa gacan ka geysanaya ka jawaabida qaar ka mid ah su'aalaha ku gadaaman geedi-socodka
- Wuxuu yeelanayaa sharciyad buuxda , sababtoo ah waa hay'ad madax-banaan oo dhex-dhexaad ah, isla markaana adeegsan karta geedi-socodyo loo dhan yahay oo ka qeyb gal leh

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Hay'ada noocan ah waxay u baahan tahay miisaaniyad dawladeed oo aad u badan
- Komishin la mid ah ayaa horey loo tijaabiyay, wuuna guul-dareystay
- Wuxuu la kulmi karaa karti xumo uu komishinku awoodi kari waayo inuu si haboon u maamulo hanaanka magdhowyada oo u baahan karti iyo fir-fircooni dheeraad ah

***Kayaarka 2aad:-Meel-marinta Geedi-socodka Magdhowyada, iyadoo lagu lamaanaynayo Dacwad ciqaab ah; hirgelinta magdhowyada bulshada, iyadoo la adeegsaanayo komishinka dibu-heshiisiinta qaranka ama Komishinka Xuquuqda Aadamaha:***

Hadii lagu qanco in la qaato nidaamka noocan ah; hirgelintiisu waxay u baahnaan doontaa in wax ka badel iyo dibu habeyn lagu sameeyo sharciyada hada jira, si awoodo dheeri ah loo siiyo hay'adaha nidaamka fullinaya

**Dhinaciia Adag:-**

- Wuxuu badbaadiyaa kheyraadka/kharashka dawlada, maadaama la adeegsanyo hay'ad horey usii dhisneyd oo sii jirtey
- Wuxuu xaqiijiyaa u qoolanaanta (masuuliyada) shaqsiga dembiga galay, iyadoo lagu waajibinayo inuu bixiyo magdhow

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Wuxuu caqabad kala kulmi karaa karti xumo ka jiri karta hay'ada loo xilsaaray fullinta hanaanka magdhowyada oo ah xaalad aad u qalafsan, una baahan in loo dhanaado
- Wuxuu wajihi doonaa dhibaatooyin dhinaca hirgelinta nidaamka iyo sidii la isugu xidhi lahaa nidaamyada kale eek al-guurka cadaaladeed
- Wuxuu noqon karaa mid aan wax natiijo ah kasoo bixin, markay ku adkaato inuu qaab-dhismeedkiisa ku fulliyo xuquuqaha magdhowyada
- Wuxuu noqon karaa mid aan waxtar lahayn, marka laga eego dhinacyada waajibaadyada cul-culus iyo masuuliyadaha balaadhan ee la saaray hay'ada fullinaysa
- Wuxuu keeni karaa khatar ka dhalata hab-dhaqamada takoorka ku saleysan , maadaama oo dhamaan geedi-socodyada nidaamku aysan maraynin hubinta iyo baadhitaanka garsoorka iyo maamulkaba

**2.10. Dib-u-habeynta Hay'ada**

**2.10.1. Guud Mar**

Geedi-socod kasta ee nidaamka kala-guurka cadaaladeed dhexdiisa, ka qeyb-galka saraakiisha iyo masuuliyiinta hay'adaha la rumeysan yahay inay galeen ama ay qariyeen xadgudubyada waaweyn ee ka dhanka ah xuquuqda aadamaha, waxaa dhab ah inay hor istaag iyo caqabadeyn sameyn doonaan.  Hadaba, waa in la dejiyaa xeelado iyo istaraattijiyado cad-cad oo ku wajahan xulashada shaqaalaha iyo dibu-habeynada hay'adaha. Sida ugu haboon, istiraatiijadaha noocan ah, waa inay suurto gal ka dhigaan soocida/aqoonsiga, baadhista, joojinta heshiisyada shaqada, iyo/ama badelaada saraakiisha iyo masuuliyiinta laga shakisan yahay ee hay'ada iyo masuuliyiinta hay'adaha kale. Habkan ayaa sahlaya dibu-habeynta hay'adeed ee rasmiga ah, taasoo kor u qaadaysa sharciyada, kalsoonida iyo shaqooyinka hay'adaha

Marka laga hadlayo xaalada Itoobiya, hay'ado badan oo ay khuseyso shaqada kala-guurka cadaaladeed, ayaa shaqadoodu iska socotaa iyadoo aan wax isbadel ah lagu sameynin qaab-dhismeedka iyo shaqaalaha ka hawl-galaba. Dibu-habeyn hay'adeed oo dhab ah waa in laga

hirgeliyaa, si kor loogu qaado fursadaha uu ku guuleysan karo nidaamka kala-guurka cadaaladeed, iyadoo laga gudbayo talaabada koowaad ee ugu adag- taasoo ah ka qaadista xilalka ay hayaan saraakiisha iyo masuuliyiinta galay ama ka qeyb qaatay xadgudubyada waaweyn ee ka dhanka ah xuquuqda aadamaha

### 2.10.2. Unugyada Dib-u-habeynta Hay'ada fulinaysa Kala-guurka Cadaaladeed

***Aqoonsiga/soocida iyo Baadhista***:-Talaabadan dib-u-habeynta hay'adeed, waxay ku saabsan tahay aqoonsiga/soocida hay'adaha iyo geedi-socodyada shaqo ee xidhiidhka la leh nidaamka kal-guurka cadaaladeed, Shaqaalaha hay'adahan ee galay ama amar ku bixiyay in la galayo xadgudubyo waaweyn oo ka dhan ah xuquuqda aadamaha, waa in la baadhaa. Si looga hortago tacadiyo ka dhalan kara geedi-socodka baadhista iyo aqoonsiga/soocida, waa in shaqada loo fuliyaa hab waafaqsan hal-beegyo ay dejiyaan hay'adaha cadaalada iyo kuwa xuquuqda aadamaha

***Shaqo-ka-joojin ama Xil-ka-qaadis:-***Intaas waxaa dheer, heshiiska shaqaaleynta ee shaqaalaha lagu tuhmay inuu galay, sababay in la galo, ama ka qeyb qaatay fullinta xadgudubyada waaweyn ee ka dhanka ah xuquuqda aadamaha, waa in la joojiyaa, ama masuuliyiintan laga qaadaa xilalka ay ka hayaan xafiisyada. Kasokow, inuusan ciqaab ka baaqsaneynin, arrintani waxay noqoneysaa mid ka mid ah aaladaha bogsiinta dhibanayaasha

### 2.10.3. Hay'adaha:- Yaa Hogaaminaya Dib-u-habeynta Hay'adeed?

Geedi-socodka aqoonsiga/soocida, baadhista iyo shaqo-ka-qaadistu, wuxuu u baahan yahay taxadar aad u balaadhan. Waa in la iska ilaaliyaa cadaalad-darro ka dhalan karta talaabo qaad aan habooneyn, lagana hortagaa hakad/baylah ku timaada shaqooyinka dawlada, iyo in la xakameeyo wixii carqalad ah ee talaabo qaadkaas ka dhalan karta. Arrintan waxaa lagu xaqiijin karaa in la adeegsado labba doorasho

***Khayaarka 1aad:- Aasaasida Hay'ad Cusub oo Hogaaminaysa Geedi-socodka:-*** Hay'adani waxay noqon kartaa mid leh qaab komishin, guddi, ama xafiis si gaar ah takhasus ugu leh kaasoo raacay habab cad-cad

**Dhinaciisa Adag:-**

- Wuxuu ka faa'iideystaa awoodaha sare ee sharciyeed, maadaama ay hogaaminayso hay'ad madax-banaan oo dhex-dhexaad ah
- Wuxuu fursad wanaagsan u helayaa inuu iska diido faro-gelinta aan habooneyn (ka imanaysa siyaasadaha, qoowmiyadaha, iyo kooxaha daneynaya)
- Wuxuu fududeeyaa la socodka iyo waafaqsanaanta nidaamyada kale kala-guurka cadaaladeed

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Wuxuu u baahan yahay kheyraad/kharash badan oo dawladeed
- Waxaa caqabad ku noqon karta inuu waayo ka go'naansho siyaasadeed oo muhiim u ah xaqjjinta waxtarnimada geedi-socodka aqoonsiga/soocida iyo baadhista

***Khayaarka 2aad: Aasaasida Waax Ku-meel-gaadh ah:***- Hanaankani wuxuu ku qotomaa sameynta waax gaar ah oo laga dhex sameynayo hay'adaha ku shaqada leh aqoonsiga/soocida, baadhista, iyo shaqo-ka-qaadista, iyadoo la raacayo habab cad-cad oo ahmiyad ku dhisan

**Dhinaciisa Adag:-**

- Wuxuu badbaadiyaa kheyraadka maadaama la adeegsanayo qaab-dhismeedyo jiray
- Wuxuu fududeeyaa kobcinta awooda fullineed ee hay'ada
- Wuxuu ka faa'iideystaa lahaanshaha hay'adeed, ka go'naanshaha siyaasadeed, iyo inuu si wanaagsan uga jawaabo khataraha ka dhasha geedi-socodka dhexdiisa

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Wuxuu xadidaa fursada in la helo geedi-socod madax-banaan oo dhex-dhexaad ah; wuxuu la kulmaa kala dhimanaansho sharciyeed
- Waxaa caqabad ku noqon karta karti xumo iyo rabitaan la'aan ku saabsan hirgelinta geedi-socod waafaqsan hal-beegyada caalamiga ah ee la isla ogol yahay
- Wuxuu halis u yahay inuu gaadho go'aano siyaasadeysan, waxaa jirta cabsi laga qabo siduu uga gudbayo caqabadaha/ka fogaanshaha danaha is-burinaya halkii uu ka fullin lahaa baadhitaano haboon iyo shaqo-ka-qaadista saxda ah

### 2.11. Arrimaha Kale ee Muhiimka ah una Baahan Go'aano laga Gaadho

Marka laga yimaado kala xulashada siyaasadaha kore ee uu dalku raacayo, arrimahan soo socda ayaa loo aqoonsaday inuu yihiin kuwo muhiim/xaasaasi ah oo u in jiho cad iyo go'aan ku haboon laga qaato, marka laga hadlayo dadaalada ay Itoobiya ugu jirto dejinta iyo hirgelinta nidaamka kala-guurka cadaaladeed

#### 2.11.1. Xad Fullineed Ku Meel-gaadh ah ee Geedi-socodka

Xad-fullineed ku meel gaadhka ah ee geedi-socodka nidaamka kala-guurka cadaaladeed, waa in ugu horeynba go'aan laga gaadhaa. Bar-bilowgu, waa inuusan si fog dib ugu noqonin, si aysan u adkaanin helitaanka cadeymaha iyo markhaatiyada. Hase yeeshee, waa inaan arrintan si dadban loogu qaadanin in la xulanayo dhacdooyinka xilliga dhow, iyadoo la iska indho tirayo ama la dafirayo xadgudubyo waaweyn oo ka dhan ah xuquuqda aadamaha ee dhacay xilli hore/fog- maadaama aragtida noocaas ah ay caqabad ku noqon doonto guud ahaan ujeedada iyo hirgelinta nidaamka kala-guurka cadaaladeed. Sidaas darteed, mar kasta oo la dejinayo nidaam xad-fullin ku meel gaadh ah, waa in si taxadar leh loo go'aamiyaa, iyadoo xaaladaha Itoobiya gudaheeda, ay tahay in loo wajaho iyadoo laga duulayo qorshaha qaranka

Nuxurka geedi-socodka nidaamka kala-guurka cadaaladeed, waa inuu xadidaa wakhtiga la soo saaray siyaasadan iyo wakhtiga ay si buuxda dhaqan galka u noqoneyso. Xaalada Itoobiya, soo jeedinta noocan ah waxay sameynaysaa dareen xoog badan- iyadoo la eegayo in hawlihii nidaamka kala-guurka cadaaladeed ee la tijaabiyay ilaa isbadaladii/dib u habeynadii 2018 aanay

wax natiijo ah yeelanin, Intaaas waxaa dheer, baahsanaanta xadgudubyada waaweyn ee xuquuqda aadamaha, khilaafaadyada iyo colaadaha sokeeye, ayaa muhiim ka dhigaya in nidaamka kala-guurka cadaaladeed ee soo socda laga dhigo mid xadkiisa fullintu uu yahay ku meel gaadh kaasoo wajahaya dhamaan dhacdooyinkii dhawaan dhacay wakhtiga uu dhaqan galka buuxa ku yeelanayo nidaamkani

Si guud marka loo eego, saddex xaaladood ayaa la kala dooranayaa marka la tixgelinayo wakhtiga uu ka bilaabanayo geedi-socodka nidaamka kala-guurka cadaaladeed ee Itoobiya. Iyadoo gebi ahaaanba waayaha ay soo martay Itoobiya ay lasoo kulantay xadgudubyo kala du-duwan oo baahsan, kuwaasoo u baahan in loo helo nidaam kala-guur cadaaladeed.

Aragtiyada ay ka qabaan dadweynaha iyo indheer-garadku, waa kuwo kala tagsan marka laga hadlayo fikirka nidaamka kala-guurka cadaaladeed; qaarkood waxay soo jeedinayaan in wakhtiga lagasoo bilaabayo geedi-socodka uu dib u noqdo ilaa xilligii Boqor Menelik II; qaar kale ayaa qaba in wakhtiguu kasoo bilaabanayo laga dhigo xilligii Boqor Xayle Sallasse, iyadoo qaar kalena ku doodayaan inuu wakhtigu noqdo xilligii 1974-tii

Hadaba, waa in laga xushaa midka ka mid ah xilliyadan, loona qaataa wakhtiga uu kasoo bilaabanayo dhaqan gelinta nidaamaka kala-guurka cadaaladeed ee Itoobiya, lana baadho faa'iidooyinka ku jira iyadoo laga duulayo ujeedooyinka guud ee lagu xaqiijinayo geedi-socodku inuu buuxiyo iyo xaaladaha kale ee hour-socodnimada

### ***Xad-fullineed Ku Meel-Gaadh ah oo ah wixii ka horeeyay 1991-dii***

**Dhinaciisa Adag:-**

- Wuxuu ogolaanayaa xad-fullin balaadhan oo lagu xalin karo tabashooyinka taariikhiga ah iyo xadgudubyada xuquuqda aadamaha ee la galay, iyadoo loo marayo

is-cafin, dib-u-heshiin, iyo nidaamyada kale, kaasoo gacan ka geysanaya in la jebiyo cuqdada/kala-qoqobnaanta xilligeedii laga yimid

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Xilliga laga bilaabayo oo aad dib loogu sii riixo ama lasii fogeeyo waxaa ka dhalanaysa caqabad ah helitaanka dhibanayaasha iyo markhaatiyada
- Xadka oo la balaadhiyo wuxuu la kulmi karaa suurta galnimada in si khaldan/been abuur ah ama xeeladeysan loo macneeyo/turjumo xilliga tagta/lasoo dhaafay
- Waxaa caqabad ku noqon karta in la awoodi kari waayo sidii fahan mideysan looga yeelan lahaa dhacdooyinkii kala du-duwanaa ee qalafsanaa iyo marxaladihii lasoo marayba
- Wuxuu indhaha ka jeedinayaa ahmiyada xaaladaha xilligan taagan- wuxuuna saameyn guracan ku yeelanayaa midho dhalnimada geedi-socodka
- Wuxuu qaadanayaa wakhti aad u dheer, in la dhaqan geliyo geedi-socodka

Si hadaba loo xusho nidaamka ugu wanaagsan eek ala-guurka cadaaladeed, dulmiyadaii/tacadiyadii iyo xadgudubyadii dhacay tagtada/wakhtiyada lasoo dhaafay ee aad u fog, waxaa kaga haboon in lagu xaliyo qorshyaasha Komishinka Wada-xaajoodka heer Qaran-marka la bar-bardhigo in la adeegsado geedi-socodka nidaamka kala-guurka cadaaladeed

***Xad-fulllinee Ku-meel gaadha ah wixii ka danbeeyay xilligii 1991-dii:-***Tixgelinta xaaladan labaad waxay noqon kartaa dejinta nidaam kala-guur cadaaladeed oo ku wajahan dhacdooyinkii soo if-baxay illaa markii ay EPRDF xukunka qabsatay 28 May 1991-dii. Tani waxay noqon kartaa xilli ku haboon in la tixgeliyo maadaama isbadel taariikhi ah uu Itoobiya ka dhacay isla markaana la galay cutub siyaasadeed oo ku cusub dalka- iyadoo la ansixiyay Axdi Dawlad Ku-meel-gaadh ah laguna soo kordhiyay xeerar hour-socod ah oo dhanka xuquuqaha aadama ah

**Dhinaciisa Adag:-**

- Waxaa la xushay xilli ku haboon in la si caadalad ah loo maareeyo dhacdooyinka
- Wuxuu si adag uga jawaabayaa xadgudubyadii waaweynaa ee ka dhanka ahaa xuquuqda aadamaha oo illaa wakhtiga sii socda kuwaasoo sababaha keenaya loo aanaynayo mudadan gaarka ah
- Waxaa si fudud loo fullin karaa raadinta iyo helitaanka xogaha iyo cadeymaha
- Waxaa ku jirta faa'iido ah in wakhti kooban lagu dhameystiro geedi-socod saameyn weyn ku yeelanaya bulshada

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Xilliga lasoo koobay wuxuu keeni karaa tabashooyin/kala-shaki ku aadan dareenka odhanaya in si ula-kac ah loo xushay iskudey lagu raadinayo cadaalad cid gaar ah
- Waxaa lagala kulmi karaa caqabado dhab ah maadaama xilligani uu ku saabsan yahay mudadii dawlada ku-meel gaadhka ahaeyd, taasoo aysan jirin nabad geliyo iyo degenaan iyo sidoo kale waajibaad dastuur

***Xad-fullineed Ku-meel gaadh ah ee wixii ka danbeeyay mudadii 1995-tii:-*** Bar-bilowga xilligan in la dejiyo nidaamka kala-guurka cadaaladed Itoobiya gudaheeda, waxaa loo arkaa inuu yahay mid ku haboon iyadoo la eegayo in xilligani uu ku suntan yahay taariikhda dastuur ee dalka ; Dastuurka JDFI ayaa la ansixiyay, waxaana si gaar ah loogu xeeriyay waajibaadka xushmeynta, ilaalinta iyo dhaqan gelinta xuquuqaha aadamaha (Qod.9)

**Dhinaciisa Adag:-**

- Xulashadan waxaa laga helayaa jiritaanka hanaan adag oo sharci oo uu ka duulayo geedi-socodku
- Waxaa la helayaa halbeeg lagaga anba-qaadi karo arrimaha isla-xisaabtanka; Dastuurku wuxuu si cad uqeexayaa awoodaha iyo waajibaadyada hay'adaha iyo masuuliyiinta
- Waxaa ku jirta fursad si fudud loogu soo uruurin karo xogaha iyo cadeymaha
- Waxaa suurto gal ah in muddo kooban lagu dhameystiro geedi-socodka

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Waxaa lala kulmi karaa tabashooyin ka imaanaya aragtida bulshada ee ku aadan in xulashada xilligan cid gaar ah cadaalad raadin loogu beegsanayo
- Waxaa ka hor iman kara arrimo sharciyadiisa la xidhiidha, maadaama uu xilligani kala saarayo labba marxaladood (kahor iyo kadib ansixintii Dastuurka) taasoo ay isla xoogagii EPRDF-tu ay hogaaminayaan dawlada oo ay weli tallada dalka hayaan

***Xad-fullineed Ku-meel gaadh ah ee Mudadii ka danbeysay 2018-kii:-*** April 2018-kii ayaa laga bilaabi karaa si ay u noqoto xilliga ku haboon ee laga bilaabayo nidaamkan; xilligani wuxuu u taagan yahay kala-wareeg weyn oo xaalada siyaasada ah. Dawladii ay EPRDF-tu hogaaminayasay ayaa dib-u-habeyn lagu sameeyay, hogaamin cusub oo isbadel-doon ah ayaa tallada dalka qabtay, waxaa la aqoonsaday/laga garaabay tacadiyadii horey usoo dhacay, waxaa laga bixiyey raali-gelin buuxda oo ku saabsan xadgudubyadii waaweynaa ee xuquuqda aadamaha laga galay, waxaa la balan qaaday in la fullinayo dib-u-habeyn qoto dheer iyo hirgelinta geedi-socod dimuqraadiyadeyn ah

**Dhinaciisa Adag:-**

- Wuxuu fududeynayaa nidaamka kala-guurka cadaaladeed oo deg-deg ah, maadaama uu ku saabsan yahay xad-fullineed ku meel gaadh ah oo xilligiisa lasoo koobay
- Waxaa jirta fursad si fudud lagu sooci karo dhacdooyinka iyo soo uruurinta xogaha/ cadeymaha

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Waxaa ka dhalan kara tuhun cadaalad-darro ay ku tirsanayaan dhibanayaashii xadgudubyada loo geystay wixii ka horeeyay xilligaas

- Wuxuu noqon karaa mid aan natiijo yeelanin, maadaama uusan geedi-socodku tixgelin siineynin sii joogitaanka shaqsiyaadkii geystay xadgudubyadii ugu badnaa, kuwaasoo ilaa maantadan xilal haya
- Kama jawaabayo/jawaabi doono dhibaatooyinka/tabashooyinka taariikhiga ah ee aasaaska u ah cadaalad-darrada jirta
- Waxaa ka dhalan kara tabashooyin/tuhun ka imaanaya in xullashada xilliga cid gaar ah loola dan leeyahay iyadoo la iska dhigayo in cadaalad la raadinayo

***Xad-fullineed Ku-meel gaadh ah ee mudadii ka danbeysay 1995-tii "Ujeedooyin Dacwad kusoo oogid iyo muddo kasii horeysa marka ay suurto gal tahay soo uruurinta xogaha iyo cadeymaha:-*** Sanadka 1995-kii wuxuu ku suntan yahay dhamaadkii awooda dawladii ku meel gaadhka aheyd, sameynta dastuurka JDFI, iyo xeerinta masuuliyada dawladeed ee ku saabsan is si cad oo mug leh loo xurmeeyo, ilaaliyo, isla markaana loo dhaqan geliyo xuquuqaha aadamaha. Tani waxay ka dhigaysaa 1995-tii xilliga ku haboon ee uu ka bilaaban karo geedi-socodka nidaamka kala-guurka cadaaladeed.

Marka laga hadlayo mawduuca dacwad ku qaadista eek u jireysa nidaamka kala-guurka cadaaladeed, waxaa la aqoonsan yahay in dhamaan dembiyadu leeyihiin muddo-dhaaf xilliyeed (ugu badnaan 25 sanno sharciga wadanka), marka laga reebo dembiyada halista ah ee ka dhanka ah xeerarka caalamiga ah

Iyadoo laga duulayo xaaladaha Itoobiya gudaheed ka jira, xulashada la tixgelinayo waxay noqon kartaa in si adag loogu dhaqanaado in dacwad lagasoo oogo dhamaan taxadiyadii la galay mudadii ka danbeysay sanadkii 1995-tii, iyadoo wixii xog iyo cadeymo ah ee la xidhiidha tacadiyo/xadgudubyada la galay intii ka horeysay xilligaas, loo adeegsan karo ujeedooyin loo aasaasi karo nidaam xaqiiqo-raadin, dib-u-heshiisiin, iyo nooc kasta oo geedi-socod kala-guur cadaaladeed ah

**Dhinaciisa Adag:-**

- Waxaa la heli karaa aasaas sharci oo adag, kaasoo yeelanaya isla-xisaabtan ciqaabeed (dacwad kusoo oogid); Dadtuurku wuxuu si cad u qeexayaa awoodaha iyo waajibaadyada masuuliyiinta
- Waxaa jirta fursad si fudud lagu sooci karo dhacdooyinka iyo soo uruurinta xogta iyo cadeymaha
- Waxay suurto gelinaysaa xal-u-helida xaaladaha la xidhiidha mudadii ka horeysay 1995-tii dhacdooyinkii dhacay, iyadoo la qaadanayo unugyo/qaabab kale oo nidaam kala-guur cadaaladeed ah

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Waxay abuuri kartaa dareen cadaalad-daro ku dhisan dhinaca dhibanayaasha ah, xulashada xilligani waxaa loo arki karaa inuu kala takoor yahay, maadaama uu xilli ku kala xadeynayo talaabooyinka dacwad-kusoo-oogida iyo nidaamyada kale eek ala-guurka cadaaladeed
- Xilliga lasoo koobay ee xulashadan waxay horseedaysaa tabashooyin/shaki ku saabsan in cid gaar ah loola dan leeyahay iyadoo la iska dhigayo in cadaalad la raadinayo
- Waxaa ka hor iman karta caqabad ku saabsan sharciyada, maadaama ay kala sooceysa mudadii ka horeysay iyo tii ka danbeysay ansixinta Dastuurka JDFI, iyadoo labada xilliba ay tallada dalka hayeen hal koox
-

### 2.11.2. Kaalinta Maamul-hoosaadyada Qaranka ee Nidaamka Kala-guurka Cadaaladeed

Dalalka ku dhaqma habka dawladimada federaaliga ah; dawlada federaalku waxay leedahay masuuliyada dejinta/diyaarinya iyo dhaqan gelinta siyaasada nidaamka kala-guurka cadaaladeed. Tani waxay salka ku haysaa in sababeynta ugu haboon ay tahay in nidaam kala-guur cadaaladeed oo waxtar yeelanaya laga dhaqan geliyo heer qaran uuna saameynayo dhamaan deegaamada/maamulada dalka oo dhan

Itoobiya gudaheeda, dawlada federaalka ah ayaa ugu haboon derejo ahaan inay dejiso/diyaariso, xidhiidhiso, ayna hogaamiso geedi-socodka. Dastuurka JDFI, wuxuu sidoo kale u xilsarayaa dawlada dhexe inay soo saarto siyaasadaha ku saabsan dhowr qaab-dhismeed oo kala duwan. Aragtidani waxay salku ku haysaa marka la eego dhinaca awood-qeybsiga, tusaale ahaan, arrimaha ciqaabta ee ku saabsan xadgudubyo waaweyn oo ka dhan ah xuquuqda aadamaha, waxaa awood sharci u leh baadhitaanka iyo soo oogistoodaba dawlada federaalka ah

Waayo-aragnimada laga helayo dalal kala duwan, ayaa iyadu taageeraysa aragtidan. Ujeedada ka danbeysa waa in nidaamka cadaalada kala-guurka ah inta badan lagu dabakho/loo adeegsado bulshooyinka kala qeybsan ee kala-isirka duwan. Kala dhantaalni kasta oo ku timaada awooda dawlada federaalka ah wuxuu khatar ku keeni karaa in geedi-socodka la afduubo ama loo adeegsado sii kala-qeybinta bulshada. Hadaba, iyadoo lagu duulayo aragtidaas, xaalada ugu saxsan ee ugu haboon, waa in masuuliyadaas loo xilsaaro dawlada dhexe

Tani kama dhigna, in qaab-dhismeedka maamul-goboleedyadu uusan yeelan doonin wax kaalin ah; balse waxay muujinaynaa oo keliya in shaqooyinkooda iyo masuuliyadooda ay tahay in lagu cadeeyo laguna xeerinayo daraasaad si wanaagsan u qodobeysan, taasoo loo fullinayo hab ku saleysan ujeedooyinka federaalnimada. Kaalintooda ka qeyb qaadashadu, wuxuu ku saleysnaanayaa ku dhaqanka xeyndaabka sharciyeed oo ay dawlada federaalku hormuud ka tahay iyo qaabeynta hay’adeed oo suurto galin kara wada-shaqeynta iyo xidhiidhinta haboon ee dhex maraysa/yeelanayaan labbada qaab-dhismeed (federal vs deegaan). Tani oo keliya ayaa damaanad qaad u noqon doontaa is si natiijo leh loo dhaqan geliyo geedi-socodka

Xaqiiqo ahaan, in fuliyeyaasha maamulka goboladu ay ka qeyb qaataan nidaam ay dawlada federallku dejisay ayna hogaaminayso, waa arrin muhiim u ah sababo dhawr ah dartood. Ugu horeyntii, xad-gudbayaasha iyo shaqsiyaadka dembiyada galay ee lagu fullinayo geedi-socodka kala-guurka cadaaladeed, waxaa laga yaabaa inay ku nool yihiin gobolada. Mida labaad, qaar ka mid ah xadgudbayaasha, waxaa suurto gal ah inay dembiyada ku galeen goobo deegaanada ka tirsan ama dembiyo lagula kacay bulshada deegaankaas.

Si gaar ah, qaab-dhismeedyada deegaanadu, waxay kaalin muhiim ah ka qaadan karaan fududeynta ka qeyb-galka dadweynaha, taageerida geedi-socodka, xaqiijinta in xadgudubyadii lagu galay deegaanka si ku fillan loogu tixgeliyay geedi-socodka dhexdiisa, soocitaanka hab-dhaqameedyada door wanaagsan ka qaadan kara geedi-socodka, iyo abaabulka saraakiisha, shaqaalaha rayidka ah, iyo hay'adaha kale si ay gacan uga geystaan geedi-socodka

### 2.11.3. Kaalinta Nidaamyada Cadaalada ee Dhaqanka ku Saleysan

Fikrada nidaamyada cadaalada ee dhaqanka ku saleysan, guud ahaan waxay ku saabsan tahay, geedi-socodyada loo maro cadaalada ee ku saleysan dhaqanka, caqiidada, iyo caadooyinka bulshooyinka kuwaasoo ka baxsan ama ka garab shaqeeya nidaamka cadaalada dawlada. Waxay isugu jiraan geedi-socodyo loogu tala galay arrimaha xaqiiqo-raadinta, ka garsoorida xaaladaha kala duwan, go'aaminta magdhowyada, iyo ka-hortaga iyo xallinta khilaafaadyada

Nidaamyada cadaalada ee dhaqanka ku saleysan, waxaa door muhiim ah ka qaadan karaan geedi-socodyada kala-guurka cadaaladeed. Waxaa jirta waayo-aragnimo muujinaysa iyadoo nidaamyada dhaqanka lagu kabayo/ladhayo geedi-socodyada kala-guurka cadaaladeed ee arrimaha habka loo marayo xaqiiqo-raadinta, cafiska, iyo dib-u-heshiinta. Hase yeeshee, nidaamyada cadaalada ee dhaqanka ku saleysan, waxaa lagala kulmi karaa su'aalo la xidhiidha ka qeyb-galka haweenka, aqbalaada xuquuqaha aadamaha, ka madax-banaanida siyaasadeed iyo xaaladha kale

Xaaladaha Itoobiya gaarka ku ah, sida kala-duwanaanshaha qowmiyadeed iyo heysashada diimaha kala duwan ee bulshooyinka dalku, waxay si dadban u muujinaysaa inay aad u adkaan doonto in la helo nidaam cadaaladeed dhaqan ku saleysan, kaasoo laga hilgelin karo heer qaran. Sidaas darteed, iyadoo la rumeysan yahay inuu ka qeyb qaadashadooda ay muhiim tahay, hadana adeegsigooda waa in si taxadar ku jiro looga fiirsadaa iyo falanqeyn iyo soocitaan haboon oo lagu ogaanayo kaalinta ay ku yeelanayaa geedi-socodyada heer deegaan/gobol. arrintan waxaa lagaga midho dhalin karaa aqoonsiga meeqaamkooda, iyo duruufaha ay ku haboon yihiin iyo goobaha looga baahan yahay in la adeegsado. Qaadashada nidaamka noocan ah wuxuu fududeynayaa culeyskii uu nidaamka kala-guurka cadaaladeed dusha saaran lahaa; sidoo kale wuxuu gacan ka geysanayaa xaqiijinta waxtarnimada geedi-socodka kala-guurka cadaaladeed si loo gaadho nabad waarta, dib-u-heshiin, iyo is-cafin

**QEYBTA 3aad**

**XULASHADA QAAB-DHISMEEDYADA HAY'ADEED EE NIDAAMKA KALA-GUURKA CADAALADEED**

**4.1. Mabaadiida lagu Hogayo Geedi-socodka Kala-guurka Cadaaladeed**

Geedi-socodka nidaamka kala-guurka cadaaladeed, waa geedi-socod qaran; waana inay hindisaan, kobciyaan, ayna hogaamiyaan hay'adaha wadanka iyo bah-wadaagta gudaha. Nidaam noocan ah oo keliya ayaa si dhab ah u damaanad qaadi doona aasaaska ku dhaqanka sharciga iyo dhismaha hay'adeed oo taaba-gal ah ee wadankagudihiisa. Intaas waxaa dheer, ixtiraamka iyo aqoonsiga mabda'a qaranimada wadanka ayaa ka dhigaysa meel-marinta geedi-socod noocan ah mid ka tarjumaysa karaamada/sharafta qaranka

Qaab-dhismeed kasta oo loo dhiso inuu fulliyo ajandaha kala-guurka cadaaladeed, waa inuu noqdaa mid sharci ah, madax-banaan, dhex-dhexaad ah, loo dhan yahay, waxtar leh, isla markaana deg-deg ah. Waa inuu xaqiijiyaa ka qeyb-galka dadweynaha uuna ku saleysnaadaa cad-cadaan dhanka awoodaha iyo qoondaha kheyraadka/miisaaniyada. Sidoo kale, qorshaha

hay'adeed waa inuu fududeeyaa xidhiidhka kala dhaxeeya nidaamyada kala duwan iyo geedi-socodyada kale eek ala-guurka cadaaladeed, si loo abuuro hanaan dhameystiran oo waxtar leh

Mid ka mid ah arrimaha muhiimka ah ee u baahan in laga jawaabo marka la go'aaminayo qaab-dhismeedka uu yeelanayo nidaamka kala-guurka cadaaladeed, waa inay suurto gal noqon doonto iyo in kale inuu fullin karo geedi-socod natiijo leh, iyadoo la adeegsanayo hay'adaha iyo qaab-dhismeedyada horey usii jiray. Qeybtan soo socota waxaan ku falanqeyn doonaa saddex qaab/nooc oo ku haboonaan kara xaaladaha Itoobiya

### 4.2. Kala-doorashada Isku-duwida/xidhiidhinta Hay'adeed

**Doorashada 1aad:-Kala-guur Cadaaladeed adeegsanaya Hay'adaha iyo Qaab-dhismeedyada horey usii jiray**

Doorashada noocan ah waxaa la isticmaalayaa adeegyada ay ka haystaan booliska, xeer-ilaalinta, garsoorka, iyo hay'adaha kale ee shaqeynaya, si loo dhaqan geliyo nidaamka kala-guurka cadaaladeed-iyadoo inta badan loo igmanayo/xilsaarayo hay'adahan masuuliyado cusub. Hase yeeshee, hay'adahani ma qaadi karaan si haboona uma dhaqan gelin karaan geedi-socodka kala-guurka cadaaladeed, iyagoo aan lagu sameynin dib-u-habeyn balaadhan; sidaas darteed, dib-u-habeynta hay'adeed waxay ku saabsan tahay in wax laga badelo xaaladaha ay hada ku sugan yihiin lagana dhigo kuswo buuxin kara/gudan kara masuuliyada cusub ee la dulsaaray. Hadii la xusho doorashada noocan ah, dib-u-habeyntu waxay ka koobnaan doontaa labba qeybood oo kala ah; dib-u-qaabeynta hay'adeed iyo xulashada hawl-wadeenada

***Dib-u-habeynta hay'adeed:-*** Hay'adaha sii jiray waxay la jaan-qaadi doonaan hawlaha murugsan iyo dalabyada nidaamka geedi-socodka kala-guurka cadaaladeed, keliya hadii lagu sameeyo dib-u-qaabeyn ku saabsan xaqiijinta madax-banaanidooda iyo la-xisaabtankooda. Waaxaha/qeybaha u xilsaaran baadhista dembiyada, iyo awoodaha dacwad-oogista, iyo fadhiyada garsoorka ee qaadaya dacwadaha, waa in la siiyo awoodo sharciyadeed oo si gaar ah

u sugaya madax-banaanidooda iyo la-xisaabtankkodab. Caadi ahaan, shuruudahani, waxay horseedayaan in la meel mariyo dib-u-habeyn sharciyeed iyo mid hay'adeedba, kaasoo suurto gelinaya dhismaha qaab-dhismeed, sharci, iyo geedi-socodyo aan mugdi ku jirin, isla markaana xaqiijinaya hirgelinta nidaam kala-guur cadaaladeed oo saameyn wannaagsan yeesha

***Baadhitaanka Hawl-wadeenada Hay'ada***:-Wajiga labaad ee dib-u-habeyntu wuxuu khuseeyaa nidaamka xulashada hawl-wadeenada. Waxay noqon doontaa arrin aan sinaba u habooneyn, in la xusho hawl-wadeen kaalin fir-fircoon ka qaatay xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadamaha, ama suurta geliyay jawi ku haboon fullinta xadgudubyada. Si gaar ah, xulashada hawl-wadeenadu, waa inay noqotaa mid lagu fulliyo baadhitaano qoto dheer, si looga saaro shaqsiyaadka aan ku habooneyn inay hawl-wadeeno ka noqdaan, iyadoo la qaadanayo/xulanayo xubno lagu aamini karo laguna kalsoonaan karo inay hogaamiyaan geedi-socodka

**Dhinaciisa Adag:-**

- Wuxuu badbaadinayaa kheyraadka dawlada, maadaama la adeegsanayo hay'ado iyo qaab-dhismeedyo horey usii jiray oo hogaaminaya geedi-socodka kala-guurka cadaaladeed
- Wuxuu fududeynayaa kobcinta awooda fullineed ee hay'ada

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Geedi-socodku wuxuu la kulmi karaa caqabado la xidhiidha arrimaha kalsoonida iyo sharciyada , maadaama uu ku dhex shaqeynayo hay'ado aan dib-u-habeyn lagu sameynin, ama la aaminsan yahay inayna marin dib-u-habeyn hay'adeed oo balaadhan
- Hay'adahu waxay waayi karaan kartidii loo baahnaa, iyo in geedi-socodka aan laga leexiyo mudnaantii uu lahaa; iyadoo hay;aduhu ay horeyba ugu sii cusleyd fullinta shaqooyinka faraha badan ee sharcigu u xilsaaray

- Wuxuu u baahan yahay dadaalo dheeraad ah si loo xidhiidhiyo shaqooyinka ay qabanayaan hay'ado tiro badan oo kala duwan

***Khayaarka 2aad:-Nidaamka Kala-guurka Cadaaladeed oo loo Aaasaasayo Komishin Cusub***

Xulashada nidaamkan wuxuu ku saabsan yahay aasaasida Komishin Xaqiiqo-raadin iyo Dib-u-heshiisiin heer Qaran ah oo hogaaminaya hirgelinta hawlaha kala duwan ee nidaamka kala-guurka cadaaladeed, isla markaana xidhiidhiya hay'adaha ku shaqada leh. Hay'ada keligeed gaar u taagan ayaa sharci lagu dhisayaa, taasoo yeelanaysa awoodo iyo masuuliyado si cad u qeexan oo la xidhiidha fullinta nidaamka kal-guurka cadaaladeed- iyadoo cashar laga baranayo khibradaha wanaagsan iyo waaya-aragnimada laga helayo Komishinka Dib-u-heshiisiinta ee hada laga noqday

Nidaamka noocan ah waa mid si balaadhan loogu adeegsato dalal badan si uu u hogaamiyo geedi-socodka kala-guurka cadaaladeed; iyadoo loo bixinayo magacyo kala duwan loona xilsaarayo ujeedooyin iyo masuuliyado waxyar laga badelay. Komishinada ka shaqeeya nidaamka kala-guurka cadaaladeed, waxaa laga aasaasay wadamada Argentina, Chile, El Salvador, Souyh Africa, Guatemala, Peru, Tior-Leste, Morroco iyo Kenya. Sidoo jkale, siyaasada nidaamka kal-guurka cadaaladeed ee Africa, wuxuu tilmaamayaa in Komishinada Xaqiiqo-raadintu ay lagama maarmaan u yihiin nidaamyada kala-guurka cadaaladeed ee dalalka Africa

Dadka dhaliila nidaamka noocan ah, cillada ugu weyn ee ay u hayaan waa waaya-aragnimadii lagu arkay komishinkii hore ee guul-dareystay- kaasoo u muuqda inuu saameyn guruacan kaga tegey qalbiyada bulshada iyo indheer-garadka dalka.

Hase yeeshee, waxaa iyaduna u baahan in la ogaado, in dhibaatada dhabta ah ee lasoo deristay komishinkii hore ay ahayd ama intooda badan la xidhiidheen dhanka sharciyada lagu aasaasay iyo qaab-dhismeedka loo dejiyay-taasoo ka dhigtay mid fadhiid ah oo aan waxqabad laheyn

**Dhinaciisa Adag:-**

- Wuxuu ka faa'iideysanayaa derejada sare ee aqbalaada caalamiga ah, maadaama lagu dhisay iyadoo laga duulayo khibradaha wan-wanaagsan iyo waaya-aragnimooyinka laga siman yahay
- Waa nooc macquul ay tahay inuu helo sharciyad balaadhan uuna suurto geliyo dhex-dhexaadnimo
- Wuxuu leeyahay karti/awood-fullineed balaadhan, sababtoo ah waxaa jirta daneyn siyaasadeed oo aad u sareysa, kuna wajahan nidaamka kala-guurka cadaaladeed (wuxuu kasban doonaa qoonde-miisaaniyadeed)
- Wuxuu xaqiijiyaa dareen lahaansho iyo isla-xisaabtan wanaagsan, maadaama uu qaab-dhismeedku ka caawinayo inuu geedi-socodku tixgelin siiyo murugsanaanta iyo wajiyada badan ee nidaamka kala-guurka cadaaladeed, uuna xaqiijinayo geedi-socod ka qeyb-gal leh

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Wuxuu leeyahay ama uu heli karaa gashiyo xadidan oo dhanka kobcinta awooda fullineed ee hay'adeed
- Xulashada noocan ah waxay u baahan tahay kheyraad dawladeed oo badan iyo wakhti dheer oo diyaar-garow ah
- Waxaa suurta gal ah inay dawlada Itoobiya ka caga-jiido, sabab la xidhiidha waaya-aragnimada komishinkii hore laga dhaxlay

***Khayaarka 3aad: Nidaam Kala-guur Cadaaladeed oo la adeegsanayo Hay'adihii horey usii jiray, laakiin leh Awood-kordhin dhanka xidhiidhinta ah, ama Fagaare xidhiidhineed***

Xidhiidhin dhameystiran oo aan kala go' laheyn ee dhamaan hay'adaha bah-wadaagta ah, ayaa muhiim u ah ka midho dhalinta geedi-socodka kala-guuka cadaaladeed. Iyadoo aan la eegaynin nooca hay'adeed ee nidaamkan, waxaa xaqiiqo ah oo lawada ogsoon yahay in shaqooyinka iyo

masuuliyadaha ku lifaaqan geedi-socodka kala-guurka cadaaladeed, ay yihiin kuwo dhex-taal ah (cross-cutting), kuwaasoo inta badan ay fulliyaan wax ka badan hal hay'ad ah.

Tusaale ahaan, Dhismaha Komishin gaar u taagan, ama hirgelinta geedi-socodka kala-guurka cadaaladeed iyadoo la adeegsanayo hay'adihii horey usii jiray, midna meesha kama saarayo ama kama maarmi karo baahida loo qabo wakaalad dawli ah oo awood badan inay hogaamiso hawlaha baadhitaanka iyo soo oogida dacwadaha ciqaabta ah. Xidhiidhin dhameystiran ayaa muhiimad gaar ah u leh nooca danbe ee nidaamka

Marka la waayo xidhiidhinta, waxaa muuqan doona dadaalo kala daadsan- kuwaasoo daciifinaya guud ahaanba geedi-socodka. Sidaas darteed, siyaasada nidaamka kala-guurka cadaaladeed, waxaa laga rabaa inay si cad u dejiso jihooyin ku saabsan sida ugu wanaagsan ee loo xidhiidhin karo shaqooyinka gooni-gooida ah iyo nidaamyada kala duwan ee geedi-socodka. Siyaasadani waa inay muujisaa qaab-dhismeed suuto gelinaya xidhiidhka ay wada yeelanayaan hay'adaha kala duwan. Caadi ahaan, waa in la aasaaso Boordhiga Xidhiidhinta Kala-guurka Cadaaladeed ee Qaranka ama Guddi heer qaran ah

Boordhiga Xidhiidhinta Nidaamka Kala-guurka Cadaaladeed Qaranka ama Guddiga heer qaran, waa inuu mulkiile ka noqdaa geedi-socodka, uuna dabagalaa hirgelinta shaqooyinka gaarka ah ee hay'adaha fullinaya

Boordhiga/guddigu wuxuu xubnihiisa kasoo qaadan karaa ha'adaha ka qeyb qaadanaya fullinta, dabagalka, ama taageerada geedi-socodka kala-guurka cadaaladeed. Tiro u dhaxeysa 5-3 wakiilo shaqsi ahaan loo soo xulanayo, iyadoo laga duulayo dhex-dhexaadnimada iyo madax-banaanidooda. Wakiiladu, waxay geedi-socodka ugu shaqeyn doonaan si buuxda oo rasmi ah

Wakiilada ka imanaya hay'ad dawli ah waxaa lagasoo xulan karaa xubnaha golaha wakiilada shacabka, garsoorka federaalka, Wasaarada Cadaalada, Komishinka Booliska federaalka, Komishinka Xuquuqda aadamaha Itoobiya, iyo Komishinka Wada-xaajoodka Qaranka

Xubnaha shacabka ah waxaa lagasoo dhex doorayaya bulshada, iyadoo loo marayo hanaan madax-banaan oo dhex-dhexaad ah (sida xaalada komishin cusub oo la sameynayo). Sidoo kale, waxay qabanayaan xilalka shir-gudoomiyaha iyo xog-haynta ee boodhiga/guddiga. Shaqsiyaadkan waa in lagu yaqaano dabeecad wanaag, aaminimo, uuna leeyahay dareen lahaansho oo ku aadan nidaamka kala-guurka cadaaladeed. Waa in habraac loo diyaariyo qaabkii ay xubnaha boordhiga/guddiga uga mid noqon karaan dhibanayaasha iyo dadka kasoo badbaaday xadgudubyada

***Xog-heynta Boordhiga/guddiga Qaranka ee Nidaamka Kala-guurka Cadaaladeed:*** Xog-heynta Boordhiga/guddigu waxay u xilsaaran tahay xidhiidhinta iyo hirgeinta shaqo maalmeedka aan ka midka ahayn waajibaadyada la siiyay hay'adaha kala duwan ee nidaamkan fullinaya.

Si gaar ah, xog-heyntu, waxay diyaarinaysaa habraacyada shaqo, siyaasadaha, awaamiirta, iyo dhokumintiyada kale ee la xidhiidha habsami u hirgelinta geedi-socodka kala-guurka cadaaladeed. Xog-heyntu, waa inay yeelataa awood buuxda oo ay ku dabagasho/kormeerto geedi-socodyada, iyo waajibaadyada lagu xaqiijinayo hirgelinta nidaamkan, iyadoo xog-heyntu si iskeed ah u dabagaleysa ama usii mareysa hay'adaha ku shaqada leh

**Dhinaciisa Adag:-**

- Nidaamka noocan ah wuxuu jawaab ka bixinayaa ama uu xalinayaa khataraha ka hor imanaya doorashada 1 iyo doorashada 2. wuxuu ka gudbayaa/xalinayaa taageero la'aanta ka imanaysa kala qeybsanaanta siyaasadeed ee la xidhiidha aasaaska komishinka, wuxuuna si muuqata u badbaadinayaa kheyraadka dawlada
- Wuxuu ka faa'iideysanayaa heerka waxqabadka iyo sharciyada, maadaama uu suuro gelinayo inay dad khubaro ah ka qeyb qaataan geedi-socodka

- Wuxuu jawaab xal u ah ka bixiyaa khataraha ku lamaan dareenka lahaansho la’aanta hay’adeed, sababtoo ah wuxuu si xoogan ugu hawl galayaa nidaamka xidhiidhinta oo uu hay’adaha ku dabagalyo; sidoo kale wuxuu hay’adaha fursad u siinayaa inay sida ugu wanaagsan u fulliyaan doorka ay ku leeyihiin hirgelinta geedi-socodka
- Wuxuu xaqiijiyaa taaba gelinta kobcinta awooda fullineed ee hay’ada, maadaama la isku dhafayo qaab-dhismeedyo cusub iyo hay’adihii horey usii jiray

**Caqabadaha (Dhiniciisa Jilicsan):**

- Nidaamka noocan ah waa mid aad ugu yar wadamada, wuxuuna la kulmi karaa caqabado dhanka waaya-aragnimada caalamiga ah la xidhiidha
- Magacaabista xubnaha cusub iyo aasaaska Xog-heyntu, waxaa hor istaagi karta ama caqabad ku noqon karta kala qeybsanaanta siyaasadeed, iyo arrimo ku saabsan qoondaha kheyraadka/miisaaniyada
-

## 5. Gunaanad

Maanta, nidaamka kala-guurka cadaaladeed, waxaa loo arkaa inuu yahaymid ka mid ah aaladaha ugu waxtarka wanaagsan ee bulshooyinka kasoo baxaya xaaladaha khilaafyada iyo xukuumadaha macangaga ah, una soo gudbaya hanaanka dimuqraadiyada. Sanadihii tegay wadamo iyo bulshooyin badan ayaa ka faa’iideystay geedi-socodka-wuxuuna kulansaday aqoon iyo waaya-aragnimo sare oo heer qaran iyo mid caalami ahba

Waxaa jira duruufo qasbaya inay haboon tahay diyaarinta iyo hirgelinta nidaamka kala-guurka cadaaladeed ee Itoobiya yeelato. Duruufaha heer qaran ayaa u baahan geedi-socodka. Nidaamka kala-guur cadaaladeed, wuxuu lagama maarmaan u yahay dar-dar gelinta dhismaha qaranka iyo xaqiijinta sii jiritaanka dalka.

Dimuqraadiyadayn iyo nabad waarta lama gaadhi karo/xaqiijin karo hadii uusan jirin nidaam kala-guur cadaaladeed oo waxtar leh. Ugu danbeyntii, nidaamka kala-guurka cadaaladeed,

wuxuu muhiim u yahay ilaalinta haboon ee xuquuqda aadamaha iyo xushmeynta mabaa'diida ku dhaqanka sharciga

Hindisayaashii hore ee Itoobiya gudahaeed kuna saabsanaa geedi-socodka kala-guurka cadaaladeed, ahmiyad mayna siinin xaqiiqo-raadinta, dib-u-heshiisiinta, bogsiinta, iyo abuuritaanka muuqaal qaran oo laga mideysan yahay; waxay ahaayeen kuwo aan dhameystirnayn, isla markaana aan waxqabad laheyn. Itoobiya waa inay cashar ka barataa waaya aragnimadeeda, ayna hirgelisaa nidaam kala-guur cadaaladeed oo ka turjumaya duruufaha iyo fursadaha qaran, kaasoo waafaqsan khibradaha wanaagsan iyo hal-beegyada caalamiga ah